# MURTI KAAB

# Mahad-Naq.

Ugu horeen waxaan u mahad celinayaa Alle subxaanahu watacaalaa oo igu dhaliyey in Aan qoro buuggaan ii Na fududeeyey qoristiisa.

Waxaan marka xigta umahad Celina-yaa waalidkay-ga oo ay ugu horeeyso Hooyo Macaan, walaalahayga kuwaa oo dhammaan Garab igu siiyey in aan maanta heerkaan gaaro.

Waxaan sidoo kale u mahad Celinayaa Abwaan Axmed obsiiye Cilmi oo Garab igu siiyey xagga magac bixinta.

Waxaa kale oo aan U mahad-naqayaa intii Bogaadinta iyo boorrinta iLa garab Taagneed, muddadii koobnayd ee aan badwaynta qoraalka ku jiray.

Waxaan sidoo kale u mahad-naqayaa Dhamaan aqristayaasha soomaaliyeed ee jecel in ay aqriyaan buugaagta si ay wax uga faa'idaan, si Gaar ah waxaan ugu mahad naqayaa aqristayaasha ku xiran buugaagta aan qoray kuwaa oo mar walba igu bogaadiya in aan soo saaro buugaag bulshada wax tar u leh.

Ugu danbeyn waxaan u mahad-naqayaa inta jacel xigmadaha/murti iyo sidoo kale maah-maahyada kuwaa oo in badan jecel in ay waxa ka faaidaan Buugaan Ugu tala galnay in aan xasuusino Xigamadaha.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

## Hordhac.

Alle ayaa mahad iska leh, Ka dibna Nabigiisa Naxariis iyo Nabad-galyo korkiisa ha ahaato, ehelkiisa, asxaabtiisa iyo dhamaan dadka diintiisa raacay.

Buuggaan waa Buug ka kooban Laba qeyb oo kala ah :

**Qeybta Horre:** waa qeyb ka hadlaysa xigmaddo(murti) oo dhinacyo badan ah iyo oraahyo kala duwan kuwaa oo aan ka soo maan guurine dad qubaro ah oo dunidda hor maro kala duwan ka sameeye kuwaa oo isugu jira dad soomaali ah iyo kuwa ajanabi ah.

**Qeybta Labaad :** waa qeyb ka hadlaysa Maah-maahyo kuwaa oo isugu jira Qeybo kala duwan oo dhinac walba leh.

Buugan ayaa ah mid soo koobi doona dhamaan qeybaha aan kor ku soo xusanay iyadoo hab wanaagsan ay u qoran yihiin, waxaana filayaa dhamaan in dad baddan ay wax ka faa'idi doonaan.

Waxa uu ka qeyb qaadan doonaa in dib loo soo celiyo Maah-maahya dii lagu yaqaaney soomalida, kuwaas oo in badan aan halkan ku kulminay.

Dhanka kale waxa uu wax kaa faahansiin doonaa Buuggaan ama kuugu baraarujin doonaa Xigmaddo iyo oraahyo xiiso leh kuwaa oo kor u qaadi doona kalsoonidda naftaada waxna kaa tusi doono Nolosha iyo qiimaheeda. Ugu danbeyn waxa jecelahay in aad si wacan u aqrin doontid buuggaan wixii hafasho ah oo aad aragtina Noogu soo hagaajin doonti.Cinwaankaan : engmaanka114@gmail.com.

**Tell: 0025261721164.**

MURTI

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

1. ***Abaal marinta ugu fiican oo aad heshid marka aad shaqo qabatid waa in ay shaqadaas si fiican u dhamaataa.***

2. ***Adduunyo waxaa ugu xun qof guri kale xaaqaya isagaoo kiisa uu wasaqeysan yahay.***

3. ***Adeegso ereyo kooban oo nuxureysan. Cod fasiix ah oo la fahmi karo.***

4. ***Aduunka marka aad ka takto waxa laguu xusuusan doonaa wixii aad ka taktay xumaan ama wanaag, Aakhiro marka aad takto waxaa laguu xisaabin doonaa wixi aad soo sameysay ee Camal xun ama camal wanaagsan. Doorashada adigaa leh inta aad nooshahay.***

5. ***Aduunkan Qofna ma aha, qof ceeb ka saliim ah, haddii aad qof kaga fogaato qalad uu sameeyay, waxaad weligaa keli ku ahaandoon taa dunida. Wax yar xukmi, wax badan Jeclow.***

6. ***Agoonka iyo Rajada ma aha qofka waaye labadiisa waalid, balse Agoonka iyo Rajada waa qofka aan Laheen Cilmi iyo Edab.***

7. ***Akhrisku waxa uu caqliga uga dhigan yahay sida jimicsigu uu jirka uga dhigan yahay.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

8. ***ALbaabka furaaayaashiisa bataan, in uu furnaado ayaa dhaanta.***

9. ***Alle SWT ha kaaga jawaabo ducadaada gaarka kuu ah, ha masaxo ilinta kaa timaada adigoo keligaa ah, ha baabi'iyo waxa aad ka cabsato ee sirta kuu ah, hana ku gaarsiiyo halka aad rabto in aad gaarto ee gudahaaga ka guuxaya.***

10. ***Anigu hibo gaar ah ma' lihi, laakiin waxa aan doonayo raadintiisa ayaan ka daalin.***

11. ***Anigu waxa aan isu diyaariyaa waxa ugu xun, laakiin waxa aan rajeeyaa waxa ugu fiican.***

12. ***Aqoon aan Edab Laheyn waa geed aan miro Laheyn.***

13. ***Aqoontu waxa ay kaa Dhigtaa qof Aamusan oo Caqli badan lkn Jahligu waxa uu kaa Dhigaa Qof qaab Daran oo Qeylo badan.***

14. ***Asxaabtaada waxa ugu wanaagsan qofka kuu gula taliya inaad shanta waqti salaada jooktaysid.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

15. ***Awooda Qaran laguma cabiro baaxada Ciidankeeda, balse waxaa lagu gartaa sida ay ula dhaqanto dadkeeda kuwa ugu liita.***

16. ***Awoodda wax lagu su'aal geliyo waa aasaaska horumarka aadanaha oo dhan.***

17. ***Aan yoolkeena ku LaaLno meeL sare; nafaheena aynnu ka dalabno inta aynu qaban karno in ka badan.***

18. ***Badanaa inta madaxtinnimada ka agdhawi, yaraana inta qarannimada ka agdhawi.***

19. ***Badanaa walaal aanay hooyadaa dhalin.***

20. ***Badda halkeeda ayay u joogtaa dadkoo dhan.***

21. ***Ballan kasta waxa ay leedahay qiimo.***

22. ***Bariga gabadhu wejiga ayaa ay qarsataa, galbeedkana lugaha.***

23. ***Boqor kasta xilli buu ahaa ilma yar oo Oohin badan, Dhisme kasta oo weyn xilli buu ahaa naqshad warqad ku qoran, keliya Muhiim ma aha halka aad maanta joogto ama taagan tahay,Laakiin waxa muhiim ah halka aad BerI gaari doontid.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***24. Bulshadaadu waa Suuqa Fekerkaaga , Caqabaduhu waa casharka Guusha, Adkaysigu waa Hanashada Hiigsigaaga.***

***25. Bulshooyinka guuleystey waxey gacan qabtaan hal-abuuraha ee maaha kuwa afka iyo adinka ula taga hal doorka.***

***26. Buurtan aad xambaarsan tahay, waxa keliya oo lagaa rabay in aad korto dhinaca kalena ka degato, laakiin adigaa dhabarka & garbaha ku qaatay oo culays isaga dhigay.***

***27. Cadarka wanaagsan hadiyad ka wanaagsani ma jirto ee ogow cidda aad wax u hadyadaynayso.***

***28. Cadawgaaga mar keliya ka feejignoow, laakiin saaxiib la moodkaa badan ee qofka aad la saaxiibayso kun jeer ka feejignoow. Immisay dhacday in saaxiib cadaw isu rogay uu xog'ogaalnimo boqonta ku jaray ruuxii aaminay.***

***29. Cadowga Xorriyadda ma murmaan, balse waa ay qayliyaan oo ay rasaas ridaan (Dagaalamaan) .***

***30. Cafiska waa sida qorrax soo baxday roob da'ay ka dib.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***31. Calaamada Qaangaarnimada dhabta ah waa markii qof ku dhibaateeyo ka dibna aad isku daydo in aad xaaladooda fahanto iyo waxa ay sidan u sameynayaan inti aad isku dayi laheed in aad ka aargoosato.***

***32. Calafka waa mir geed saaran oo kale oo ma dooran karto halka ay dhulka kaga dhacayso.***

***33. Caqabadaha nolosha ayaa qofka ka dhiga mid wanaagsan.***

***34. Caqabaduhu geeri ama dhimasho ma keenaan, balse dilaaga noloshu waa murugada iyo welwelka.***

***35. Caqabaduhu kuma joojin karaan, Dhibaatada kuma joojin karto, Dad wax kaa sheegay kuma joojin karaan, adiga keliya ayaa naftaada joojin kara oo dib u dhigi kara.***

***36. Caqliga caafimaadka qabaa jir caafimaad qaba ayuu ku jiraa- Chorge Barnaadisu.***

***37. Carrab ka waa turjumaanka caqliga qofka.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***38. Carrab kaagu yuusan ka sheekeyn ceebaha dadka kale, adiga laftaada ceeb baad leedahay qof kastana carrab buu leeyahay. Hadii ishaadu aragto ceebaha walaalkaa, ka qari kuna dheh: "Indhaheygow! Qof kasta indhuu leeyahay.***

***39. Ceeb maaha in hadiyad lagu siiyay aad u sii hibayso qof kale, laakiin ku dadaal in xitaa haddii aadan u baahnayn aad haysato hadiyadda lagu siiyay qofka aad hadiyadda siin lahaydna mid kale u raadiso.***

***40. CIRKU Malaha xad ama meel uu ku dhamaaddo, Maskaxdu waa sidaa oo kale.***

***41. Cuntada waxaad u cuntaa in aad ku Noolaati ee uma noolid In aad cunto kali cunti .***

***42. Daacad u noqo dalka mar walba. Daacad u noqo dowladda marka ay mutaysato.***

***43. Daacadnimada dhabta ah uma Baahna cadeyn.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***44. Dad badan ayaa iska dhigaya wax aysan ahayn markaas waxay ilaawaan waxa ay ahaayeen. waxaana dhuma awoodohoodi.***

***45. Dad qaarkii waxa ay la yaabaan ama is weydiiyaan sababta dhibaatada ugu soo noq-noqoneyso, ma oga in Imtixaanka iyo casharadda la soo cel-celiyo ilaa qofku wax ka barto ama wax ku qaato.***

***46. Dadd ka qaarkii waxay isku dayaan in ay banaanka soo dhigaan wixii kaa qaldan, sababtoo ah ma xamili karaan mana aqbali karaan wanaaga iyo waxa saxda ah ee aad sameynayso.***

***47. Dadaal iyo qiimo waxaan ku bixinaa xirashada dharka ugu qurxoon iyo kuwa ugu qaalisan, balse waxaan is ilowsiinaa bedelista dhaqamada iyo dabeecada heena guracan. Ogow, weelka qaaliga ah ma sameeyo cunto dhadhan macaan.***

***48. Dadka cidlada & kelinimada soo arkay ayaa ugu naxariis badan. Dadka murugo soo maray ayaa ugu dhoola cadeyn badan, Dadka Jab badan soo gaaray ayaa bixiya Jaceyl badan. Dhamaan sidaa waxay u sameynayaan Sababtoo ah ma doonayaan inay arkaan qof u dhibaatoonaya sidi ay ka soo gudbeen.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***49. Dadka inta badan ilmeeya ma aha dad jilicsan. Oohintu waa sida Qalbigaagu u hadlo goortii bushimahaaga aysan sharixi karin xanuunka aad dareemayso.***

***50. dadka kale inaad u sheegtid dhibaatooyinkaaga waxba kama faa'idaysid, arinkaaga ilaahay u dhiibo lana aamus.***

***51. Dadka oo dhan jecloow, dad yarna ku kalsoonoow, cidna xaqa ay kugu leedahay ha ku xad-gudbin.***

***52. Dadka qaar ma rabaan in ay runta maqlaan sababtoo ah ma doonayaan in dhalanteetkooda la burburiyo.***

***53. Dadka qaarkii marnaba ma lunto quruxdooda si kasta oo ay u weynaadaan, da'na ugu darsanto, sababtoo ah quruxdoodu marnaba ma ahayn wejiga, waxa ay ahayd Qalbiga.***

***54. Dadka qaarkii waa sidii daruurta oo kale, goortii ay kaa taggaan waxay kuu noqotaa maalin qurxoon.***

***55. Dadka sida dhabta ah isu jecel si sahlan kuma kala haraan. Haddii ay jirto Boqol sababood ay ku kala tagi karaan waxay helaan Hal sabab ay ku wada joogi karaan.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***56. Dadka Wanaagsan waa sida Shumaca oo kale; waxay u gubaan (u dhibaan) naftooda si ay iftiin u siiyaan dadka kale.***

***57. Dadka xiqdiga iyo calool xumada badan u noqon sida geedka timirta ah ee marka dhagax lagu tuuro rucub timir ah soo daadiya.***

***58. Dadku 80% wey iska aamusaan xitaa kolki ay rabaan inay wax yiraahdaan si ay uga fogaadaan muran qof ay daneynayaan.***

***59. Dadku cid wax u bilowda ayey la'yihiin bilaaw adigu cid kula dhamaysa waayi maysid.***

---

***60. Dadku ma ilaawan kuwa caawiyey waliba marka uu waqtigu adagyahay.***

***61. Dadku ma oga oohintaada, Dadku ma oga murugadaada, Dadku ma oga xanuunkaaga, balse waxay dhammaan ogaadaan goortii aad hal qalad sameyso. Laakiin Alle SWT ayaa og Ilin kasta oo indhahaaga ka timaada, wuxuuna kaa cafiyaa qalad kasta oo aad sameysay. Ha rajo dhigin.***

***62. Dadku waxay inta badan hilmaamaan inay kuu mahadceliyaan markaad wanaag u sameyso, laakiin marnaba***

***ma hilmaamaan inay ku eedeeyaan haddii aad hal qalad ku sameyso.***

***63. Dadku waxay yiraahdaan ma garanaysid faa'iidada & qiimaha waxa aad haysatid illaa aad weydo… laakiin xaqiiqdu waa, waad garanaysay waxa aad heysatay ee waxaad u qaadatay oo kula ahayd in aadan weligaa waayi doonin.***

***64. Dagaalku waxa uu leeyahay xeer la iska yaqaanno oo ah, "Goob kasta oo la go'doomiyo, gurmad dibadeedna aanu u iman, waxa ay ku dambaysaa uun in ay is dhiibto" Haddaba dumarkuna waa sidaas oo kale uun.***

***65. Dareenka jacayl haddii afku sheegi kari waayo, indhaha ayaa uu ka soo baxaa. (Indhaha qofkaa laga gartaa).***

***66. dhabar jabin kasta oo gadaal kaaga timaada waa tii horey kuusii qaada.***

***67. Dhaktar ayaa mar yiri, "Daawada ugu wanaagsan dadka waa Jaceyl." Qof ayaa weydiiyay, "Ka waran haddii uusan shaqeyn?".***

***68. Dhibicdu waa isku mid; laakiin wehelka, halka ay tagtay, ayaa muhiim ah.***

# MURTI KAAB

***69. Dhoola-cadayntu waa jawaabta ugu fiican Ee Aad cadowgaaga siin kartid.***

***70. Dhibtu waaa furaha fekerka, fekerkuna waa furaha aqoonta, Aqoontuna waa furaha Guusha.***

***71. Diyaaradd wadisteedu waxa ugu adag marka aad ka kicineesid dulka.***

***72. Ducada aad sameyso kolki aad Sujuudsan tahay waa waxa Qalbigaaga sida dhabta ah u rabo. Waa meesha keliya aysan fikradahaagu ka awood badin karin dareenkaaga.***

***73. Dulqaad yari iyo deg-deg waa xididka dhibaatadaada, ma qasbi kartid Nolosha inay ku siiso Jawaabo ama sidaad rabto wax kasta u dhacaan, waa inaad oggolaataa in wax kasta iyaga is furfuri doonaan, waa in aad aqbashaa in wax kasta waqti qaataan.***

***74. Dulqaadku waa geed qaraar oo soo saara miro macaan.***

***75. Dumarku had iyo jeer uma baahna Qeylo iyo wax sheeg joogta ah. Mararka qaarkood waxay u baahan yihiin Gacan ay qabsadaan, Dhego dhageysta, iyo Qalbi fahma.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***76. Dunida waa ay neceb tahay isbeddelka, sidaas oo ay tahayna isbeddel ku waa waxa kaliya ee keena horumarka.***

***77. Dunida waa bad weyn oo dad baadn ayay qaqisay.***

***78. Dunida waa bad weyn oo dad badan ayay qarqisay ka dhigo cabsida ilaaheey Doonidaada, shiraaceedana ka dhigo talo saarashadiisa.***

***79. Ereyga wanaagsani waa furaha quluubta dadka kale. Ee Adeegso mar walba***

***80. Fahmadda way ka baaxad weyn tahay Aqoonta. Waxaa jira dad badan oo ku garanaya, laakiin in yar baa ku fahmi karta.***

***81. Farxada dhabtaa ma ahan in aadan oo yin ama aadan murugoon, Ee waa in aad Raalli ku tahay wax walba oo maalmuhu kuu qarinayaan kuna mahad naqdaa adiga oo dhoola cadaynaya.***

***82. Farxaddu waa nooc ka mid ah dhiiri galinta.***

***83. FARxadu waaa furaha guusha.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***84. Farxadu waxa aad heli kartaa marka aad awooddo in aad naftaada ka xoreyso dhammaan waxyaabaha kaa jeedin kara farxada.***

***85. Faynuustu ma hadasho. Waxay isku soo bandhigtaa iftiinkeeda. Kuwa guuleystay marnaba ma aha inay naftooda buun-buuniyaan, balse waxqabadkooda ayaa la rabaa inuu soo bandhigo oo hadlo.***

***86. Fekerkaagu waa Hantidaada , Fulintaada waa awoodaada, Maskaxdaadu waa La taliyahaaga.***

***87. Gabadha ninka hanataa waa ta in ay bakayle fulay ah ka dhigto, isagana mar kasta u sheegta in uu libaax yahay.***

***88. Gabadha Talyaani haddii aad jacayl u sheegato kuma rumaysanayso in aad dhab u jeceshay illaa aad darteed dhagar u gasho, Gabadha Inigiiris jacaylkaaga ma rumaysanayso illaa aad xoolo badan ku bixiso. Laakiin gabadha carbeed in aad jeceshay waxa ay rumaysanaysaa oo keliya marka aad guursato.***

***89. Gabadha waxaa laga abuuray laf ninka ka mid ah; laakiin madaxa lagama soo saarin laftaas si aanay ninka u xukumin, lugihiisana lagama saarin s;i aanu ugu tuman, laakiin dhinaciisa ayaa laga saaray si ay markasta hareer taagnaato.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

***Weliba gacmihiisa hoostooda si ay uga agdhowaato wadnihiisa si uu u jeclaado.***

***90. gabadhaada u doon inta aadan u doonin wiilkaaga, maxaa yeelay gabadhu waa ceebtaada.***

***91. Gabar ayaa weydiisay Nin Sheekh ah, "Sidee baan ku ogaan karaa in uu si dhab ah ii jecel yahay?" Sheekhi ayaa ugu jawaabay, "Naftaada keliya ha eegin, hubi marka hore in Allihi ku abuuray uu jecelyahay. Sidee buu qof kuu jeclaan karaa ama kuu siin karaa Jaceyl dhab ah, goortii aysan xitaa jeclayn Allihi adiga ku abuuray?.***

***92. Gabar kasta oo careysan ama murugaysan waxaa ka dambeeya nin aan wax fikrad ah ka haysan waxa qaldan uu sameeyay.***

***93. Gawaarida Rolls Royce iyo Bentley ma laha wax xayeysiin (iidheh) ah. Sababtoo ah waxay garanayaan qiimaha & tayada Alaabtooda inay macaamiisha u keenayso. Markaad taqaan qiimahaaga uma baahnid inaad is xayeysiiso, is tus iyo ha lagaa sheego sameyso. Sare u qaad qiimahaaga qofnimo, adkee shaqsiyadaada iyagaa hadlaya oo dadka kuu bandhigaya.***

***94. Geedka waxaa lagu qiimeeyaa miraha ama harka uu bixiyo, bini'aadamka waxaa lagu qiimeeyaa ficillada ay sameeyaan. Camalka wanaagsan marnaba ma khasaaro; Qofka beerta***

***aadaab & hab dhaqan wanaagsan wuxuu gurtaa miraha xushmadda iyo jaceylka dadka u hayaan.***

***95. Geesigu waa qofka fahmi kara masuuliyad ka timaada xuriyadiisa.***

***96. Geesinimadu ma aha in aadan cabsan. Geesinimadu waa in aadan u oggolaan cabsidaada in ay ku joojiso.***

***97. Geesinimadu waa qiimaha keliya ee lagu iibsan karo nabadda.***

***98. Geesinimadu waa qofka oo cabsidiisa xakameeya, ee ma'aha cabsida oo qofka ka guurta.***

***99. Geesinimadu xoog ma'aha, waayo kaneecaduba waxa ay ka dhiijisa sanka libaaxa.***

***100. Goortii aad aqbasho qof waxaat aqbashay wixii ay horay usoo mareen oo dhan. sidaa darteed, dib ha u soo gocan hana u adeegsan.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***101. +Goortii aad lacag amaahaneyso, ka deynso qof baasayste ah, dhanka xun wax kasta ka eega, marnaba ma filayo in aad dib u soo celin doonto.***

***102. Goortii aad meel sare joogto, Saaxiibadaa way garanayaan qofka aad tahay. Goortii aad soo dhacdo, adigaa garanayaa saaxiibadaa dadka ay yihiin.***

***103. Goortii aad Tukaneyso, ka taxaddar Qalbigaaga. Goortii aad Dadka dhex joogto, ka taxadar Carrabkaaga.***

***104. Goortii aad u qaadato in Aduunyadaadi dhamaaneyso, ha is dhiibin. Kor eeg, ka dibna dhoolacadee sababtoo ah Alle ayaa mar kale Iimaankaaga tijaabinaya.***

***105. Goortii aad wax Cuneyso, Ka taxadar Dhuuntaada (Cunaha) Goortii aad nin kale Gurigiisa ku sugan tahay, ka taxadar Indhahaaga.***

***106. Goortii Maskaxda iyo jirka qofku daciif yahay, xaalad kasta waxay ku noqotaa dhibaato, Goortii maskaxda iyo muuqaalka jismiga qofku xoogan yahay, xaalad kasta waxay u noqotaa fursad.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***107. Goortii qofku horummariyo awooda uu ku dhageysan karo ama ku aqrin karo faallo #Negative ah isagoon caroon ama deganaantu kalumin micnahedu waa in uu noqday qaangaar iyo aqoonyahan dhab ah.***

***108. Goortii shimbirtu dhimato… Quraanjada ayaa cunta shimbirta.***
***Goortii Shimbirtu nooshahay… Waxay cuntaa Qudhaanjada.***

***109. Guul gaaristu lugo uma baahna ee dhiirasho ayey u baahantahay.***

***110. Guul-darreystuhu waa Labo Jaad:***

- ***Mid ku yimaada feker Aan Laheyn Fal.***
- ***Mid ku Yimaada Fal aan Laheyn Feker.***

***111. Guuldarradu waxa ay timmaadaa keLiya marka aynnu hilmaamno hadafyadeenii, u jeeddooyinkeenii iyo mabaa'di'deenii.***

***112. Guurka iyo gabowguba ninka waa u edbin iyo anshax barid.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***113. Guurku lammaanaha hal qof ayuun baa uu isaga dhigaa, laakiin labadooda ka uu halkaa qof noqonayo ayaa ah sirta aan guurka ka hor la sii ogaan karin.***

***114. Guurku waxa uu ku bilowdaa, bisha kalgacalka, waxaa xigta bisha hadalka, waxaa xigta bisha riyada, kadib waxaa bilowda bilaha murugada.***

***115. Guusha dadka kale ma aha Adiga Guuldaradaada ama Fashilkaaga, marnaba ha ka xumaan qof kale Guul uu gaaray. Is diyaarin, dadaal badan, doonid joogta ah, Dulqaad & Duco ayaa inta badan ah sababaha Guusha.***

***116. Guushu waa hortaada ee kaama dambayso, horay eeg marna gadaal ha eegin.. horay eeg hadda.***

***117. Ha dayicin fursad aad qof kugu dheer ku gaadhsiin karto hadyada ama ugu yaraan Salaan qaaliya.***

***118. Ha fiirin siyaasadda Duqsiga ee fiiri siyaasadda shinnida.***

***119. Ha is dhiibin markaad la kulanto dhibaato ee u qaado inay tahay uun wax ku xoojinaya, waayo guul kasta dhibaataa kaa xigta ha yaaraato ama se ha waynaato.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***120. Ha ka baqin in aad is bedel sameyso. Ha ka cabsan in aad fashilanto ama dhibtooto. Ogsoonow haddii aan mugdi jirin marnaba ma aadan aragteen xidigaha.***

***121. Ha ka caajisin hana is dhiibin, halganka aad Maanta ku jirto, wuxuu kuu diyaarinayaa Awoodda aad Beri u baahan tahay. Dhib kasta oo ku soo martay waxay fursad u ahayd koritaankaaga qofnimo.***

***122. Hadaadan Duuli Karin, ORod.***

***Hadaadan ORdi Karin , soco.***

***Hadaadan soco Karin , Garguuro.***

***Si kastaba ay ahaataba, isku day in aad horay u socoto.***

***123. Ha ka cabsan cadowga kuu soo bareera oo ku soo weeraray, laakiin iska ilaali saaxiibka beenta ah ee Hab ku siiya.***

***124. Ha ka dhigan farxadaada in ay ku xirnaato wax waqti kooban ah ama wax aad waayi doonto, Alle raali gelintiisa ka raadso Farxad sababtoo ah isaga keliya ayaa Baaqi ahaanaya.***

***125. Ha ka quusan dadka aad jeceshahay. Dulqaadkaaga iyo daacadnimadaada ayaa Laga yaabaa in ay kuu soo ceLiso.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***126. Ha ka warwarin haddyid lagu siiyey yarideeda, muhiimaddu maaha qiimaha shayga ee waa in uu qofkani ku xasuustay kuuna muujiyey in uu kuu gacan furan yahay.***

***127. Ha ka welwelin waxa dadka kale yiraahdaan ama kuu arkaan. Kani waa Jaceylkaada, ma aha kooda.***

***128. Ha ku ciyaarin shucuurta dadka kale, waa suurtogal in aad ciyaartaa ku guulaysato (Ka gaadhay danta aad ka lahayd ) laakiin khatarta ka dhalanaysaa waa in aad qofkaas weydo.***

***129. Ha ku mashquulin Gefkii shalay, Ka feker Fursadaahada Maanta , Berrina waad Gaari Guul.***

***130. Ha liidin, ha dhibsan, hana dulmin qof Noloshiisa.***
***In badan oo awood is biday, is kibrisay, dadkana dulmiyay ma dhiman ilaa Alle uu ku duleeyay umadda hortooda!.***

***131. Ha murugoon haddii dad aad abaal badan u gashay kugu jisaaraan ama cadow kugu noqdaan. Xusuuso, Alle oo dadkan abuuray, nimco badan siiyay, ayay in badan ku caasiyeen, aysan adeecin awaamiirtiisa. Maxaad filaysaa adigoo ah maskiin daciif ah?.***

***132. ha noqon qof afka kaliya wax ka sheega kana go'aamiya, laakiin ha wada socdaan go'aankaaga iyo waxqabadkaagu.***

***133. Ha u oggolaan xiriir hore oo noloshaada ah inuu burburiyo Farxada mustaqbalkaaga. Nabarka ama xagtintu waa inay ku xasuusiyaan wixi aad ka soo gudubtay, ma aha halka aad ku socoto.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***134. Ha u ogolaan in ay duruufuhu ku beddelaan. Adigu beddel duruufahaaga.***

***135. Habka keliya ee isbeddel ku dhici karo waa dadka oo si aad ah ugu lug yeesha geeddi socodka siyaasadda.***

***136. Had & jeer ku duceyso in aad hesho Indho ka arka Dadka waxa ugu wanaagsan, Qalbi cafiya waxa ugu xun ee lagu sameeyo, Maskax hilmaanta wax kastoo xun, iyo Ruux aan marnaba lumin Rumeynta & Iimaanka Rabi.***

***137. Hadaaad barato deeqsinimada iyo cafiska ogow waxaad baratay siduu allah kuugu naxariisan lahaa.***

***138. Hadal jees-jees & ka fiirsasho la'aan loo yiri ayaa xurguf sababi kara. Hadal axmaqnimo ah ayaa nolol baabi'in kara. Hadal naxariis iyo dhiirigelin ah ayaa qof bogsiin kara ama bedeli kara. Qof kastana isagaa dooran kara waxa uu ku hadlayo iyo sida uu u hadlayo.***

***139. Hadal wanaagsan ku hadal hadii kale iska aamus.***

***140. Haddaba, qof kasta oo Alle ku xiran, daciifnimadiisu ma ahaaneyso mid dhibaato u geysata. Qof kasta oo aan Alle ku xirneyn, Awood kastuu leeyahay, si kastoo hub iyo Ilaalo badan u heysto, ma aahaaneyso mid faa'iido leh oo wax tarta.***

***141. Haddii aad aragto gabadh ka sheekaynaysa ninkeeda oo ku tilmaamaysa qurux iyo dhammaystirnaan ama ragannimo, waxa aad ogaataa in ay carmal tahay… Gabadhu khudradda bisil intay haysato ma jecla ee marka ay khaayisto ayey wanaaggeeda garataa.***

***142. Haddii aad caado ka dhigato in aad ka cadhooto wax kasta oo ku raalli gelin waaya, abidkaa nolosha ku xasili maysid.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***143. Haddii aad doonayso in aad goyso <u>qof aad jeceshay</u> ama saaxiibkaa, dhaawac ha kaga tegin.. Qofka qalbigiisa ina siiyey, innagama mudna in aynu waran ku taagno ama ilbidhiqsi uu murugoodo sabab u noqonno.. Maxaa ka fiican in qof aad kala tagteen in xusuustiinna uu ku hadho waqtigii fiicnaa ee aad soo wadaagteen.***

***144. Haddii aad doonto Khayrka minjo u noqo, laakiin sharka madax ha u noqon.***

***145. Haddii aad haysato guri aad u hayato, meel aad seexato, cunno aad quudato, dhar aad huwato, OGOW dadka dunida oo dhan 75% Adigaa ugu hodansan.***

***146. Haddii aad ilma yar hadyad siinayso, sii wax mustaqbalkiisa wax tara, sida in aad ka bixiso lacagta waxbarashada ama in aad geyso dugsi fiican oo aad u doortay.***

***147. Haddii aad ka cabsan jirtay kelinimada (cidlada). Hada ka cabso inay saaxiib kuu noqdaan dad xun.***

***148. Haddii aad ku Laasho yoolkaaga meel aad u Sarreysa oo aad guuldarreysato, waxa aad ku soo dhici doontaa meel ka sarreysa dadka kale oo dhan guushooda.***

***149. Haddii aad Qalbigaaga wada siiso qof, way dhaawacayaan, wada sii Qalbigaaga Alle SWT, isagaa kuu toosinaya, kuuna xoojinaya.***

***150. Haddii aad tahay shicib; wax ha xadin, been ha sheegin, wax ha khiyaamin sababtoo ah Siyaasigu ma jecla Tartan.***

***151. haddii aad u ogolaatid dadka kale in ay maamulaan fakarkaaga iyo go'aamadaada hadaba waxaa tahay qof laga roon yahay.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***152. Haddii aadan ahayn <u>qoraa</u> anfaca dadka, noqo akhriste anfaca naftiisa.***

***153. Haddii Aadan baabi'in Karin caddaaLaddarro, ugu yaraan qof walba ogaysii caddaaLadarrada jirta.***

***154. Haddii adigoo ah Nin Xaas leh, aad is aragto inay aad kuu soo jiitaan Gabdhaha School-ka dhigta, <u>Xaaskaaga</u> u iibi dharka Schoolka.***

***155. Haddii ay caddaaladu ka dhammaato dhulka, macno ma samaynayso joogitaanka dadka ee dhulka korkiisa.***

***156. Haddii ay ku dhacdo caleen geed Ubax ah, aad bay u iftaa;***

***157. Haddii ay tahay waqtiga ugu wanaagsanaa ama waqtiga ugu xumaa waa waqtiga keliya aad heysato, adigay ku jirtaa sidi aad ka dhigan lahayd waqtigaaga & sidi aad uga faa'iideysan lahayd.***

***158. Haddii dadku xog dhammeystiran helaan waxa ay sameyn doonaan wixii la gudboon balse marka aan xog dhammeystirin la siin ayaa ay, sabab la'aan wax iska necbaadan ama iska jeclaadaan.***

***159. Haddii dhibic biyo ah ku dhacdo Haro, muuqeedi wuu lumayaa.***

***160. Haddii Aadan Awoodin hadal xaq ah ha usacab tumin Baadilka. (Xumaanta iyo Gardarada).***

***161. Haddii hadiyad laguu keeno ha u eegin in aad u baahantahay iyo in kale, ee waxa aad u eegtaa qiimaha kalgacalka uu qofku kugu xasuustay.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***162. Haddii hadiyad laguugu keeno Weel, Shandad ama shay aad celinayso ha Celin isaga oo madhan, haddii aad buuxin kari waydo, wax uun ku rid, laakiin ha ka duwanaado hadyaddii marka hore laguu soo hadyadeeyey.***

***163. Haddii idinkoo raba inaad (group photo) sawir koox ku gashaan ay kuu dhiibaan camera-da oo ku yiraahdaan sawirka naga qaad, ha u qaadan inay ka wadaan adigaa noogu foolxun! ee sawir fiican ka qaad.***

***164. Haddii laba ruux faras keliya wada fuulaan, waa qasab in midkood uu dambeeyo.***

***165. Haddii qof si dhab ah u rabo in uu qeyb ka noqdo Noloshaada, waxay si <u>dhab ah</u> u sameynayaan dadaal si ay ugu soo biiraan. Nolol la wadaagayo ma aha wax la jili karo ama afka keliya laga sheegi karo.***

***166. Haddii ukunta banaanka laga jebiyo, nolosheedi waa dhamaataa. Haddii laga jebiyo gudaha noloshi waa u bilaabataa oo digaagad yar baa dhalata. Noloshaada & wax kastoo sareeya waxay ka bilowdaan gudaha, marnaba ha sugin wax banaanka kaaga yimaada in ay ku bedelaan ama farxad kuu keenaan.***

***167. Haddii xiriirkaaga mar kasta kaa oohiyo, Fariiso, neefso ka dibna waxaad is weydiisaa "Ma Basal baan qabaa mise bini'aadam".***

***168. Haddii aad Danbi ku dhacdid ha Lasoo qaadin qofna ama cidna, Maxaa yeelay bila'aadanka badankii wax ma qariyo ee iLaahay ayaa wax qariya oo dhaafa.***

***169. Hadii aad dhibsatay halka aad ku nooshahay ka guur.matihid geed meesha kabaxay is-bedelku gacantaada***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***ayuu ku jiraa adiga ayaana naftaada ka masuul ah.***

***170. haddii aad doonaysid in uu iLaaheey qariyo ama asturo ceebtaada fadlan iLaali ama astur dadka kale ceebahooda.***

***171. haddii aad doontid in uu kaa joogsado walwalka ha fiirin dhibaatooyinka ee fiiri nimcooyinka ilaahay ku siiyey.***

***172. Haddii aad jeceshahay laba qof, dooro kan dambe sababtoo ah haddii aad si dhab ah u jeclayd kan koowaad ma aadan jeclaadeen kan labaad.***

***173. hadii aad mar xiddigaha gaartid wax ka hooseeya ha ku qancin.***

***174. Haddii aan waddaniyadda la barin, waxa ay u badan tahay askarigu in uu danbiile noqon.***

***175. Haddii ay kusoo mari waydo jaanis guul aad ku gaartid , samayso mid aad ku gaartid.***

***176. Hadiyad aad cid siin lahayd ha la sugin Xaflad ama Munaasabad gaar ah oo aad bixiso. Mar kasta bixi hadiyadda. Miyaanay qurux badnayn in aynu hadiyad haba yaraato u qaadno marka aynu soo booqanayno Ehel ama Asxaab.***

***177. Hadiyaddu waxa ay beertaa Kalgacalka, waxa aanay kordhisaa Jacaylka.***

***178. Hal Geed ayaa sameyn kara malaayiin Tarraq ah… balse Hal xabo oo tarraq ah ayaa gubi kara malaayiin Geedo ah.***

***179. Halka aan ka soo jeedno iyo duruufaha inagu xeeran waxaa laga yaabaa in ay saameyn ku yeeshaan naftaada, laakiin adigaa ka mas'uul ah qofka aad noqoneysid.***

***180. Hooyadu waa goob wax barasho, dadka ay soo saartana ayaaha danbe ayey dadka hogaamiyaan.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***181. Howl badan ayaan dib u dhignaa inagoo leh "Waqtigaan haboonayn", Waqtiga habooni waa dhalanteed, dhalanteedka lama qaban karo, ee ereygaas ka siib maskaxdaada.***

***182. Ifka waxaa ugu ladan qof taladiisii ilaahay u gacan gashay.***

***183. Immisuu lacag iyo hanti ururiyey nin aan calfanayn, immisaa qof ayaa cuntay xoolo iyo hanti aanu ururin.***

***184. In aad gabar jeclaato waa waxa labaad. Marka koowaad baro in aad xushmeyso.***

***185. In aad raalligeliso dadka ku kugu xeeran oo dhami waa arrin aan suurtagal ahayn, sidaa awgeed ha isku mashquulin aragtiyahooda taban ee ay kaa aaminayaan, ee keliya ku dadaal in aad adigu raalli ka tahay naftaada iyo ficillada aad ku kacayso adiga oo aan dadaal gelinayn raalligelinta dadka kale.***

***186. In aad shakido ma aha qalad. In aad mar walba shakisanaato si aan kala go'lahayn ayaa cillad ah.***

***187. in aadan is dhiibin Waa Hababka Guusha.***

***188. Inaa daacad ahaato kuma heli kartid saaxiibo badan balse waxaad ku helaysaa saaxiibo run ah.***

***189. Inaad ka quusato hadafkaaga Nolosha hal caqabad darteed waxay ka dhigan tahay inaad saddexda taayar ee gaariga iska saartid sababtoo ah hal taayar baa kaa banjaray, fariistay.***

***190. Inaad Waxbixisid ayaa ka farxad badan in aad wax qaadataa.***

***191. Inanta caqliga badani ninka ma raadsato, xitaa haddii ay jeceshay, waayo ugaadhu ma eryato ugaadhsadaha.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***192. Inta aan ka caawiyo kuwa kale in ay guulaystaan waa inta aan anigu guulaysto.***

***193. Inta ay gacantaadu furantay laba shay ayuun baa la hubaa in aad hayn karto, waa dhibicda maadadda Meerkeriga (Mercury) iyo gabadha, maalinta aad gacanta isku xidho ayaana labadaba kuugu dambaysa.***

***194. inta uu maanka gaajaysan yahay Guul waa wali.***

***195. Intaa miro tiin abuurato ma filaysi inee miro tufaax kuu soo baxaan.***

***196. Isbeddel kasta oo weyni waa in uu fishaa iska cabin, maxaa yeelay wuxuu gilgilayaa dad darajooyin sare haysta.***

***197. Isbeddelku weLigii ma immaanayo marka dadku aanay haysan awooddii iyo dhiirranidii ay iyagu ku arki Lahaayeen cidda ay yihiin.***

***198. iska iLaali fikradadha qaldan in ay ku hogaamiyaan ama aad raacdo, AWoodahaada oo dhan iskugu geey ka shaqeynta arimaha wanaagsan.***

***199. Iska ilaali hadalka Boobsiis ka ah .iska ilaali erayo iyo luuqad adag.***

***200. iska ilaali in wejiyada dhalaalkooda aad qofka shaqsiyaddiisa ku xukmiso. waxaad wax ku cabirtaa qofka carrabkiisa iyo ficilkiisa in ay is lahaadaan.***

***201. Iska ilaali inaad u noolaato si kibir & isla weyni leh, si is tus-tus iyo ha lagaa sheego, keliya waxay kuwan qofka dhaxalsiiyaan inuu waayo deganaan maskaxeed, kuna noolaado naceyb iyo caro.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***202. Iska ilaali saaxiibada xun ama nolosha ka dhacay inaad wax badan ag joogto ama raacdo, ogow saaxiibada noocaas ah inay keligood dhintaan ma rabaan waxay rabaan inaad isla dhimataan. Markaad aragto kuwaa ka carar!.***

***203. iskadaa dacaayada iyo nacaybka.***

***204. Jacaylka kediska ahi waa ka ugu cimriga dheer.***

***205. Jacaylku ma aha wax aad adigu raadiso balse asiga ayaa ku soo raadsada.***

***206. Jacaylku waa in laba qof isku mar danaysteyaal noqdaan.***

***207. Jacaylku waa shaqada qofka bilaa camalka ah, iyo nasashada qofka shaqeeya.***

***208. Jacaylku ma aha wax Adigu Aad raadinaysid Balse isaga ayaa ku soo Raadsada.***

***209. Jacaylku waxa uu keliya ku noolaan karaa hadal cad oo aan waxba la isku qarin, taasina waa dhaqan aanay gabadhu jeclayn.***

***210. jaceylku waxba ma aha hadaan ficil lasocon. Aaminaadu waxba ma aha hadaysan cadayn (daliil) lasocon. Raali galintu waxba ma aha haddii aan isbedel jirin.***

***211. Jaran jarada nolosha midna haka boodin hadii kaLe waad rafaadi ugu horeen waxbaro, kadib shaqeeso, ka dibna jacayl sameeso, ugu danbeen guurso.***

***212. Jeclow ama ka tag Qalbi ku dhaawacay, balse marnaba adigu ha dhaawicin Qalbi ku jecel. Run waa loo ekaysiin karaa dhoola-cadeyn iyo qosol been ah, laakiin marnaba lagama been sheegi karo ilinta iyo dareenka dhabta ah.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***213. Jiilka Maanta: Waa necebyihiin inay hurdada ka kacaan Subaxnimada hore. Caajis badan baa haya Casarki, Galabti. Waa daalan yihiin Fiidki. Waa careysan yihiin markay sii seexanayaan Habeenki.***

***214. joogtee Xamaasadaada nafeed adigoo dib u jaleecaya guulahaaga aad gaartay.***

***215. Jooji fakirka ah in aad duruuftan adag & dhibkan weligaa ku jiraysid. Sida xilliyada sanadka isu bedelaan ayay xaaladuhu isu bedelaan, noloshu waa wareeg, mana jirto wax sidooda iska ahaanaya weligood, xitaa naftaada waxay leedahay taariikh ay dhacay.***

***216. Jooji in aad ka murugooto kuwa wax ka sheega noloshaada! Had iyo jeer waxaa jiraya qof aan fikrad ka haysan dhibka aad u soo martay si aad u gaarto halka aad joogto maanta***

***217. Ka bilaaw meesha aa joogti. Isticmaal waxa aad heesati. Qabo waxa aad aboodi.***

***218. Ka dhago la'ow hadalada niyad jabka ah si aad u gaadho hadafkaada.***

***219. Ka dheeroow dadka Niyad jabka abuura ee aan wax rajo ah ka lahayn nolasha, waayo adna waxay kugu dari karaan kooxdooda ka dhacay nolosha.***

***220. ka dheerow malaha xun, iyo fikradaha Khiyaaliga ah ee buga ah.***

***221. Ka faa'iideyso oo si fiican u isticmaal waqtigaaga. Dib waad u aqrisan kartaa qoraal, <u>fariin</u> ama Buug, Waad ku soo ceshan kartaa video muuqaal ah ama mid dhageysi ah laakiin ma jiro Aduunka nidaam "System" dib kuugu soo celin kara Waqtigi ku dhaafay ee aadan isticmaalin ama ka faa'ideysan.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***222. Ka fiirso qofka aad aamineysid ee aad dhibaatooyinkaaga ugu warrameysi. Qof kasta oo kuu dhoolla cadeeyaa ma aha saaxiibkaa.***

***223. Ka fogow Xanaaqa, adiga keliya ayay ku dhaawacaysaa. Maxaad la caroonaysaa? Hadii aad saxsan tahay looma baahna in aad carooto, hadii aad qaldan tahay xaqba uma lihid in aad xanaaqdo.***

***224. Ka hor taga ayaa ka wanaagsan iska daaweenta.***

***225. Ka taxadar Aaminaada, aad bay u jilicsan tahay una jabi ogtahay. Goortii ay jabto, waxaa ka dhalan kara baaba'a. Way adag tahay in dib loo kasbado. Xaqiiqdii marnaba ma ahaaneyso sideedi hore.***

***226. Kala fogaanshuhu ma baabi'iyo xiriirka. Ma aha inaad aragto qof jaceyl idinka dhaxeeyo maalin kasta. Muhiim ma aha joogitaanka qoloftaada ee waa waxa Qalbigaaga ku jira.***

***227. Kali ahaanshuhu waxa uu ka wanaagsan yahay in aad xariir xun sameesati.***

***228. Kalsoonida Naftaada ah waxay cabsi ku Abuurtaa Cadawgaaga si kastay Awood U leeyihiin.***

***229. Kama dhigi kartid kumana qasbi kartid qof inuu ku jeclaado. Waxa aad sameyn karto waa in aad noqoto qof la jeclaado. Wixi soo hara iyagay u taal***

***230. -Kama shalaayo waqtigii i dhaafay mar haddaan weli noolahay ee waxaan ka shalaayaa waqtigii aan ku lumiyay dadka Xun.***

***231. Karaamada iyo weynida qofka waxa lagu qiyaasaa illaa xadka uu diyaar u yahay in uu u naxariisto kuwa xaqqiisa qaladka ka gala.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***232. Kasbo inta aad awoodid, bixi inta aad awoodid, kaydso inta aad awoodid.***

***233. khaladka markasta uu bato guul waa kuu dhowdahay, maxaa yeelay khalad kasta cashar buu kuu yahay.***

***234. Kolki uu rabo inuu aamus ku yiraahdo haweenay, ninka caadiga ah wuxuu ku yiraahdaa "Naga Aamus" ninka caaqilka ah wuxuu ku dhahaa "Bushimahaaga aad bay u qurux badan yihiin marki aad isku qabato!"***

***235. ku faan xijaabkaaga mar waliba, maxaa yeelay hadii aad ku qurux badan tahay la aantiis ogow waxa qiimaha, quruxda iyo qaaliga isku darsaday waa laga qaryaa dadka kale ishooda.***

***236. Kula socodka saaxiib meel mugdi ah ayaa ka wanaagsan in aad keligaa meel iftiin ah socoto.***

***237. Kuligeen bulshadaan dhaleecaynaa waxaanse is ilowsiinaa inaan qayb ka nahay bulshada..Dhaleecaynta dhaaf!.***

***238. Kuwa raba in ay gurtaan faa'iidada Wadankooda waa in ay dulqaad u yeeshaan daalka iyo xanuunka ay kala kulmaan taageerida Wadankooda.***

***239. La fadhiiso <u>dadka caqliga badan</u>, xitaa haddii ay yihiin cadawgaaga, waayo caqligu caqliga ayuu la hadlaa.***

***240. Lacagtu marka hore sidii Diinka oo kaley aye kuugu timaadaa, laakiin marka danbe sidii haramcad oo kale aye kaaga baxdaa.***

***241. Lacagtu waxa ay kuu gadi kartaa daawo lakiin kuuma goyso caafimaad.***

***242. Lamaanuhu uma baahna in ay soo post-gareeyaan sawiradooda ama xiriirkooda si ay dadka ugu cadeeyaan,***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***waxay u baahan yihiin inay iyaga isu cadeeyaan jaceylkooda. Haddii ay kala huraan uma baahna inay block isa saaraan ama waxyaabo dhega hadal ah isu soo qoraan, sidaasi waa habka ugu foolxun xiriir ku dhamaado***

***243. Lammaanaha is qabaa si ay farxad iyo isfaham ugu noolaadaan waxaa muhiim ah in labadooda midkood uun garaad badnaado, (Haddii ay labaduba garaad badnaadaan is hoggamaaminta ayaa lumaysa)***

***244. Ma aaminsani in aad qaato Go'aan sax ah, waxaan qaataa Go'aan ka dibna waxaan ka dhigaa mid Sax ah.***

***245. Ma aha in aad Gubto buugaag si aad u bur buriso Dhaqan. keliya Dadka ka jooji in ay Akhriyaan.***

***246. Ma awoodo in aan dabaysha marin habaabiyo, balse waxa aan awoodaa in aan shiraaca Doontayda u Hagaajiyo hadba dhanka aan doonayo.***

***247. Ma badali karno dabaysha lakiin waxaan xajin karna doonta.***

***248. ma dhici karto in aad gaartid guul wax ku ool ah adiga oo anan ku fin oo aadan kicin marar badan.***

***249. Ma jiro qof Aduunka ku nool oo ka baqa inuu Runta sheego. Qofku wuxuu ka baqaa inuu wajaho cawaaqibka, natiijada ka dhalata marki Runta la sheego!.***

***250. Ma jirto dhibaato xal loo helay oo aanay dumurku xal u heliddeeda kala qeyb qaadan raga.***

***251. Ma joojin kartid carabyada (hadalada) dadka laakiin ha u oggolaan carabyada (hadalada) dadka inay adiga ku joojiyaan.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***252. Ma joojino ciyaarta marka aan waynaano laakiin waan waynaana sidas darteed waan joojina ciyaarta.***

***253. Ma joonin karno dhibaato in ay dhinaceena soo aado oo noo timaado, laakiin waxaan awoodi karnaa in aynaan siin dhibaatada Kursi ay ku fariisato oo nagula joogto.***

***254. Ma maamuli kartid dad; walxo ayaad maamuli kartaa. Waad Hoggaamin kartaa dadka.***

***255. ma ogtahay in badaha ay yihiin 7 Badood.***

***256. ma ogtahay in qofka Aadanaha ah in uu Alle Caleema saartay una abuuray Dhammaan waxa arlada saran si uu ugu faaidaysto.***

***257. Maalin aad sida libaaxa u noolaato ayaa ka wanaag badan boqol sano oo aad sida gorayada u noolaato.***

***258. Maalin kasta waa fursad aad noloshaada wax uga badali kartid.***

***259. Maalin walba waxa ku soo mara Jaanis aad ku badali karti Nolashaada.***

***260. Maalintu in ay kuu noqoto mid kheyr oo danahaaga kuu wada qabsoomaan waxay ku xiran tahay subixi markaad hurdada ka toosto wixi aad ku bilowdo; halki aad ku bilaabi lahayd facebook fiirin, email ka jawaabid, war dhageysasho, ku bilow Allihi ku siiyay fursada labaad nolosha in aad u sujuudo, xusto, ku shugrido, aadna duceysatid.***

***261. Maanta waxaa laga yaabaa inaad tahay qof awood badan. Laakiin Xusuuso, Waqtiga ayaa aad kaaga Xoog badan.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***262. Macnaha noloshu waa in nolosha macno loo yeelo .***

***263. Mar kasta aad ka shakido ilaa heerka aad gaari karto, xusuuso ilaa inta aad soo socotay, waxa aad ka soo gudubtay, dagaalada qarsoon naftaada ee aad ku soo guuleysatay iyo dhamaan cabsidi aad ka soo adkaatay.***

***264. Mar kasta aadan fahmin dhibta nolosha ku heysata, indhaha isku qabo, neefso, gacmaha kor u taag, ka dibna dheh: "Ilaahow waan ogahay in wax kasta qorshahaaga ku socdaan, wax kastana sabab ku dhacaan, Ilaahow iga caawi sidi aan uga gudbi lahaa marxaladan".***

***265. mar kasta oo aad guul gaadho iLaahay xus oo xasuuso una mahad celi.***

***266. Mar kastoo aad is tiraahdo maanta maalin xun ayay ii tahay, Xusuusnow in qof meel kale jooga uu la halgamayo nafti oo ka sii baxeysa. Ku Shugri Alle in uu ku siiyay fursad kale oo Nolosha ah manta.***

***267. Mar uu guuleystay oo la weydiiyay ma dabaal degtay ayuu ku jawaabay, "Waan soo dhameeyay dabaaldegaygi. Salaad ayaan u tukaday Rabigay".***

***268. Mararka qaar kood uma heshid Erayo ku haboon dareenkaaga qofka aad jeceshahay, balse Runta waxay tahay inuu jacaylku xalaasha ah meesha uu u hoydo ay tahay janada.***

***269. Mararka qaar waxaa Noloshaada ku soo biira dad gaar ah kuwaas oo hoos kuu dhiga, kuna dhibaateeya, si Alle SWT kuu baro in aad u noqotid iyo in aadan cidna ku tiirsanaan aan Alle ka ahayn.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***270. Mararka qaar waxaa wanaagsan in qofku iska aamuso inti uu dadka u sheegi lahaa dareenkiisa sababtoo ah way ku sii dhaawaceysaa keliya goortii aad ogaato inay ku maqli karaan laakiin aysan ku fahmi karin***

***271. Mararka qaarkoot habka ugu wngsn aad #Game ku guuleysan karto waa in aadan ciyaarin. hadaa rabto in laga guuleyato qabyaalada iyo neceebka adigu haka qeyb qaadan.***

***272. mareekanka waxaa ku yaaala biriij loo yaqaano Golden gate waana biriij ay ku faanaan lkn nasiib daro dadka is dilaya ayaa iska tuura.***

***273. Marka aad aragto duni qofkaad u jeclayd oo dareenkaaga kalkacal ka maadsanaya, niyad jab dheh.***

***274. Marka aad aragto gabadha oo muraayadda la isku eego ka cabanaysa, waxa aad garataa in ay gabowday.***

***275. marka aad bilowdo ka shaqaynta wax, ha ka cabsan guuldarada hana ka tanaasulin. Dadka sida daacada u shaqeeya waa kuwa ugu faraxda badan.***

***276. marka aad Dagsatid inaad Guul gaartid, ku adkaysi waxaanan ahayn kaama dhimana.***

***277. Marka aad dhaqaaqa badiso, ayaad ka sii xoog badnaanaysa sidii hore, ma tihid sida geedka oo kale oo haddii xididdadiisa la rujiyo dhiman kara.***

***278. Marka aad ku qanacdo in aad ahaato qofka aad tahay ee aadan qofna is garab dhigin ama aadan is dhammaystirin, qof walba wuu ku ixtiraami doonaa.***

***279. Marka aad la kulanto dhibaato oo aad garabkaaga ka waydo saaxiib kula wadaaga murugada, kaalana dabaasha masiibada, niyad jab dheh***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***280. -Marka aad la kulanto saaxiib aanad mudo arag, xiisana aad u qabtay la kulankiisa balse uu magacaagiiba garanwaayo, niyad jab dheh.***

***281. Marka aad si fudud u waydo waxii aad mudada badan ku soo tabcaysay, niyad jab dheh.***

***282. Marka aad walaalkaa ka caawiso in uu buur fuulo, waxa aad ogaataa in aad tahay qofka ugu dhow eek u xiga isaga fanashada buurtaas.***

***283. Marka aad <u>go'aan</u> gaarto, ee aad bilowdo fulintiisa, waxa keliya ee kuu muuqdaa ha noqdo in aad natiijo ka gaarto, wax kasta oo taas ka sokeeyana dan ha ka gelin.***

***284. Marka aad go'aan gaadho, ee aad bilowdo fulintiisa, waxa keliya ee kuu muuqdaa ha noqdo in aad natiijo ka gaadho, wax kasta oo taas ka sokeeyana dan ha ka gelin.***

***285. Marka ay baddu deggen tahay bad-maaxyadu waa wada xariifiin.***

***286. Marka cimrigaagu tago adiga oo aan inyarna ka gaadhin riyadaadii, niyad jab dheh.***

***287. Marka dhabarka lagaa wareemo ee aad ogaato qofka ku dilay inuu yahay ehelkaa, niyad jab dheh.***

***288. Marka eraykasta iyo ficil kasta oo kaa yimaada loo fasirto xumaan, niyad jab dheh.***

***289. Marka la dafiro deeqsinimadaada iyo waxtarkaaga, niyad jab dheh***

***290. Marka lagugu tuhmo waxa aanad gaysan dadkoo dhamina isugu markhaati furo in aad samaysay, niyad jab dheh***

***291. Marka qofka ay silsilada ku seetaysnaayeen ilaa yaraantiisii, waxa uu rumaysan doonaa in silsiladaahaasi jidhkiisa ka mid yihiin oo aanu la'aantooda socon Karin***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***292. Marka qofka laga xaarrimo nolosha uu doonayo, jidka keliya ee u furani waa in uu sharciga iyo kala dambaynta la dagaalamo.***

***293. Marka qofkii aad dunida ugu jeclayd kuu cadeeyo in aanad agtiisa wax qiima ah ku lahayn, niyad jab dheh***

***294. Marka uu ku khiyaameeyo qofkii dad kuugu xigay, niyad jab dheh.***

***295. Marka uu nin ka Garwaaqsado In uu Aabbihii saxsanaa, wuxuu dhalay wiil kaas oo u malaynaya in uu isaga qaldan yahay.***

***296. Marka xiga oo <u>Kadeed (stress)</u> badan aad dareemayso, xusuusnow: Marnaba laguma siin culeys ka badan mid aad qaadi karto. U noqo Rabigaa oo u toobad keen. Mar 2aad Xusuusnow: Imtixaan qaarkii wuu soo noq-noqdaa ilaa aad <u>cashar</u> ku qaadato, ilaa aad garato sababta ay ku dhacayaan ka dibna isbedel sameysid kuna dedaasho in aad horay u gudubto.***

***297. markii aad dhalatay, waad ooyday aduunkuna wuu farxay (ehelka), u noolow si marka aad dhimatid aduunku kuugu ooyo adiguna aad u faraxsanaatid.***

***298. markii aad ku jirto Da WAXAAD HAysataa Lacag iyo waqti lkn ma haysati Tamar ama awooda taa oo aad wax walba ku qaban karti.***

***299. markii aad ku jirto da shaqada waxaad haysataa Lacag iyo awood wax walba ku qaban karti.***

***300. Markii aad Yartahay waxaad haysataa Waqti iyo tamar aad wax walba ku qabsan karti.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***301. Marnaba aad ha uga fakirin wixi tagay, waxay kuu keenaysaa murugo. Aad ha uga fakirin mustaqbalka, waxay kuu keenaysaa welwel iyo cabsi. Ugu noolow Maantadan adigoo dhoolacadeynaya, waxay kuu keenaysaa Farxad iyo Rayn-rayn.***

***302. Marnaba ha ka tanaasulin mabda'yadaada, xitaa haddii ay kugu Hoggaaminayaan waqtiga dhow xaalad adag.***

***303. Marnaba ha Kibrin oo dadka ha iska Weynayn!..***

***304. Marnaba ha ku xulan saaxiib adigoo si dhameystiran u fahmin. Sidoo kale Marnaba ha ku waayin saaxiib is fahan daro ama muran yar.***

***305. Marnaba ha nicin dad kaa maseyrsan ama ku ximiya, xushmee maseyrkooda. Waa dad u arka in aad ka wanaagsan tahay.***

***306. Marnaba ha qaadan go'aan markaad xanaaqsan tahay , waxna ha balan qaadin markaad faraxsan tahay.***

***307. Marnaba ha u oggolaan in qof ku liido ama ku dareensiiyo in aadan qiime lahayn. Alle wuxuu kuu abuuray ujeedo cad, Alle ayaana ku Karaameeyay.***

***308. Marnaba ha yareysan naftaada, haddii weynaan iyo xoog wax taraan Maroodiga ayaa ahaan lahaa Boqorka Xayawaanka! Laakiin waxaa ah Libaax oo cudud iyo cabirba ka yar.***

***309. Marnaba kuma fakirin in aan guuldareysanayo, laakiin hada way dhacday, waxa keliya harsan waa in aan sameeyo wixi sax ah. Taasi waa waajibaadkeyga iga saaran dadka i aaminsan. Dhamaanteen waa na soo mareysaa guul darro nolosha ah.***

***310. Marnaba Maya ha ku Oran hadiyad caruur ku siisay xitaa haday dhagax tahay waxaa laga yaabaa inay tahay wixi ay heli Kareen inay ku siiyaan.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***311. Marwo weliba waxay jeceshahay ineey calfato nin kazoo bixi karo masuuliyada qoyska. Halka nin walba uu ku hami wayn yahay in uu calfado marwo kazoo bixi karto booskeda.***

***312. Maseyr yar waa u caafimaad u yahay xiriirka.. way wanaagsan tahay had iyo jer in aad ogaato in qof ka baqayo in uu ku waayo.***

***313. Mid ka mid ah dareenada ugu qoto dheer, ugu sareeya, ayna ka buuxdo kalgacal iyo farxad; Waa marki aad si qushuuc leh Salaada u tukanayso adigoo dareemaya inaad Alle hor taagan tahay, waa marki Hooyada ilmihi ay markaa dhashay ay laabta ku qabato, waa marki Aabaha ay gabadhiisa yar dhabtiisa hurdo ku qabato oo ku seexato, waa marki Saaxiibadaa ay kuu taageeraan sida qoyskaaga oo kale, Qoyskaaguna ay kuu taageeraan sida saaxiibadaa oo kale.***

***314. mugdi kasta aad marysi ha kaa horeeyo Nal, wadda ama halka aad marayso kuu ifiya.***

***315. Muhiim ma aha muuqaaggu, muhiim ma aha Muruqaaggu, Muhiim ku waa fekerkaaga.***

***316. Murugado waa xarig hadaadan iska goyn waa ku ceejin.. Ha is ceejin adigu.***

***317. Nabad galyo waxaa ugu fiican , nabadgalyada Naftaada ay degan tahay oo xasiloon tahay aan walwal iyo walbahaar kugu dhicin oo buufis uu san kuugu dhicin.***

***318. Naftaada ku xeer dad Tayo fiican leh adiga oo maanka ku haya in kelinimadu ka roon tahay la Rafiiqidda dad xun.***

***319. Nasiibku waa marka ay kulmaan diyaargarowga iyo fursadu.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***320. Nin ayaa Farmashi soo galay wuxuu ka cabanayay stress badan, welwel, xanaaq, <u>hurdo la'aan</u> & cabsi. Farmashiistihi ayaa ku yiri, "Waxaa u baahan tahay Vitamin Diin si waxan ku haya kaaga ba'aan. Marka Alle ku xirnow, Salaada iyo ducada badi".***

***321. Nin dhalinyaro ah ayaa nin Caaqil ah ku yiri, "Sidee baan Aduunka is bedel ugu sameyn karaa?" Caaqilki ayaa ugu jawaabay, "Haddii aad rabto in aad is bedel ku sameyso Aduunka, samee inta aad keliga tahay. Sababtoo ah guurka ka dib xitaa ma bedeli kartid TV channel.***

***322. Nin jilicsan ama aadka u dabacsan gabadhu waa ay ixtiraamtaa, laakiin ninka qallafsan ayaa ay jeceshay***

***323. Nin ka caqliga badan waxa uu awoodaa in uu wax ka barto su'aalaha.***

***324. Ninka halka ugu dambaysa ee dhimataa waa qalbigiisa, gabadhana waa carrabkeeda.***

***325. Ninka isagoo 50 sano jir ah u arka Nolosha sidi uu u arkayay kolki uu 20 jirka ahaa, wuxuu lumiyay 30 sano oo Noloshiisa ah.***

***326. Ninka La taliya qof aan Taladiisa daneynayn isaga qudhiisa ayaa talo u baahan.***

***327. Ninkii timir Abuuriyo ninkii tiin tallaalaba Taariikhdu way warin.***

***328. Ninku afada uu guursanayo indhihiisu waxa ay arkayaan oo keliya kuma xusho, balse dhegihiisuna xulashada waa ka qayb. (Ereyada ay leedahay ayaa muhiim u ah).***

***329. Ninku gabadha jecel laba siyood ayuun baa uu ku dili karaa; Waa dilka caadiga ah iyo dilka kale oo ah in aad jeclaato gabadh kale.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***330. Ninku mabda' uu qabo awgii ayaa uu u gawracaa qof kasta, gabadhuna qof ay jeceshay dartii ayaa ay mabda' kasta uga tallaabsataa.***

***331. Niyad wanaag kula dhaqan dadka, Wanaaagoodana baahi intaadan xumohooda saadaalin.***

***332. Nolashu waa safar dheer, mana qaadan kartid wax waLba. Keliya wixii Lagama maarmaan ah qaado.***

***333. Nolol waxey bilaabataa marka ay tirtirto dadka xun xun.***

***334. Noloshu waa sida Facebook oo kale. Dadku waxay siinayaan dhibaatadaada Like iyo Comment, laakiin qofna ma kuu xallinayo sababtoo ah qof kasta wuxuu ku mashquulsan yahay inay update-gareeyaan tooda.***

***335. Noloshu waxa aay aadka ugu dhowdahay wa dhimashada.***

***336. Noqo qof ay samaysta farxada ee ha noqon qof ay farxadu samayso.***

***337. OGow mar kasta ifka waxaa jooga qof kaa Liita xaalka aad ku jirta marka iLaahay Xamdi Adiga oo dhoola Cadaynaya.***

***338. Ogow qof ka kali ah ee Farxadaada mas,uulka ka ah in aad adiga tahay.***

***339. Ogsoonow hadii aysan adiga Amiirad kula ahayn, Walaalkeed agteeda ayay Boqorad ka ahayd, Aabaheed ayay u ahayd hadiyadi ugu qaalisaneyd ee Eebe siiyay.***

***340. Orod,socoo,gurguuro, ama xamaaro laakiin isku day inaad gaartid bartilmaameedkaaga nolosha.***

***341. Qaladka ugu weyn dadku sameeyo inta badan waa; waxay dhageystaan kala bar, waxay fahmaan rubuc, waxay sheegaan laba jibbaar wixi ay maqleen ama dhacay.***

***342. Qanacu waa kayd aan dhammaan.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***343. Qaraabada iyo ehelka cunto iyo cabbitaan la wadaag, laakiin abidkaa shaqo ha la wadaagin.***

***344. Qashinka intuu kuu jiruu buu cudurka kuu jiraa.***

***345. Qeyb baa kala soo baxda Kalluun.***

***346. Qeyb baa kala soo baxda korkooda oo Qoyan keliya!.***

***347. Qeyb baa kala soo baxda Luul.***

***348. Qeybta ugu wanaagsan Nolosha waa; Marki Qoyskaagu kuu fahmaan sidi Saaxiib oo kale, Saaxiibadaana kuu taageeraan sidi Qoyskaaga oo kale.***

***349. Qof walba oo Guuleysta waa qo dhibaato walba ka gudba.***

***350. Qof aan sabir lahayn jacayl kama guul gaadho.***

***351. Qof hadyad hore ku siiyay ha u celin haddiiba uu xumaado xidhiidhkiinu haddii ay ka fursan waydo in aanad haysan sii qof kale oo u baahan.***

***352. Qof kasta Talo weydii laakiin taada ha iloobin.***

***353. Qof kasta waxaa ku lammaan tuug xariif ah oo xadaya dhalinyaronimadiisa, tuuggaas magaciisu waa 'Waqti'.***

***354. Qof kasta Dabeecadiisa kula dhaqan si aad u soo jiidato Dad ka oo dhan.***

***355. Qof kasta wuu kuu iman karaa goortii aad faraxsan tahay ama guuleysatay, laakiin kuwa dhinacaaga jooga goortii aad niyad jabsan tahay ama fashil ku soo gaaro, kuwaas ayaa ah saaxiibadaada runta ah.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***356. Qof kasta Guul waa uu Rabaa laakiin waxaa Guulaysta qofka waxyaabaha Dhan iLoob, oo Daneeya Guushiisa oo kaliya.***

***357. Qof kastaa wuxuu rabaa in uu janada galo, Laakiin ma jiro qof raba in uu dhinto.***

***358. Qof Maskiin ah ama baahan haddii uu wax ku weydiisto ha ka bakheylin, sii wax kasta aad awoodo. Ogow sabab baad ku kulanteen adiga ayaana laguugu eegayaa in Wixi Alle ku siiyay aad wax ka bixiso iyo in lagaa soo celiyo ama Barakada laga qaado.***

***359. Qof tabar daran ha isku dayin inaad dhoola tustid Awoodaada, sidoo kalana ka ilaali faxadaada qof murugaysan hortiis, ilaali dadka kale dareenkooda sida aad u jeceshahay kaaga in la dhowro.***

***360. Qof walba ayaa waxa xun arki kara oo farta ku fiiqi kara , balse wanaaga dad yar baa arki kara.***

***361. Qofba wuxuu ku dagan yahay halkuu daacad kaga hadho.***

***362. Qofka aan lahayn mala-awaal ma lahan baadad .***

***363. Qofka aan lahayn <u>hadaf</u> waa sida markab aan raadaar.***

***364. Qofka aan xil iska saarin run ka sheegidda waxyaabaha yar yar laguma aamini karo in uu run ka sheego waxyaabaha waaweyn.***

***365. Qofka doonistiisa sharci ka dhigaa, sharci la'aan ayaa uu dhacaa .***

***366. Qofka ku Caawiya, ha Hilmaamin Qofka ku Jecel, ha Nicin, Qof ku Aaminay, ha Qiyaamin.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***367. Qofka nafsad ahaan xasilooni waxa uu awood u leeyahay in uu shucuurtiisa xakameeyo, oo uu ka adkaado naftiisa si aanay iyadu uga adkaan.***

***368. Qofka oo cadhooda marka la canaantaa, waa astaan muujinaysa in uu mudnaa canaantaa.***

***369. Qofka oo naftiisa ka hela, qabkiisana ku qancaa waa tilmaamta Liidashada lagu garto.***

***370. Qofka raadinaya Haweeney wanaagsan qurux iyo caqli badan, wuxuu raadinayaa 3 dumar.***

***371. Qofka ugu dambeeya ee Maskaxdaada ku jira marka aad seexanayso habeen kasta & qofka ugu horeeya aad ka fakirto marki aad toosto subixi waa sababta farxadaada ama murugadaada.***

***372. Qofka wanaagsani waa ka mar kasta garanaya qiimaha waxa aad siisay leeyahay, xitaa haddii uu wax yar yahay .***

***373. Qofka Xaflad iyo Shir aan looga yeerin dalaq iska soo yiraahda ama dad si gaar ah u sheekeysanaya soo dhex gala waxa loo yaqaan is-casume. Weligaa ha noqon is-casume. Meel walba ka muuqo waa lagu muunad beelaa.***

***374. Qofka xoolihiisa u foofiya kaymaha habar dugaag hoyga u ah, ee ilaashan waaya iyaga ayaa ka dammaanad qaada ilaaladiisa.***

***375. Qofkii cid jeclaanaya soo dhawaysanaayo ama nacaayo iska fogaynaya waa in ale dartii ujeclaada ama u nacaa ee ma aha in aad isha qabiilka wax ku Eegto Arinta Alana dhinac marto.***

***376. Qofkii doonaa in uu kordhisto raasamaalkiisa wuxuu raadiyaa siduu ku kobcin lahaa oo ku badin lahaa.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***377. Qofkii quba qiimahaaga marbuu garan qaayahaaga.***

***378. Qofkii wanaag beera waxa uu istaahilaa mahadnaq wayn.***

***379. Qofna haku nicin hana ku dhibsan nabar meel kamid ah jirkiisa ka muuqda xitaa dildilaaca caloosha hooyada marka ey dhasho sababtoo ah dhaawac kasta wuxuu reebaa xagatin. (Haar) xagatin kastana waxay sheektaa sheeko. "Sheekadaasoo oranaysa , "waan" badbaaday.***

***380. Qofna intuu Qabrigaaga soo istaago ma oranayo "Wuxuu wadan jiray Mobilo qaali ah, Waxay lahayd Sawiro qurux badan, Wuxuu lahaa Guri weyn, Waxay kaxeysan jirtay Gaari sare" laakiin inta God yar lagu geliyo ayaa lagaa soo dhaqaaqayaa, keliya waxaa ku raacaya Camalkaagi Aduun.***

***381. Qofna kaama dhigi karo inaad dareento liidnimo ama niyad-jab ilaa aad adigu u oggolaato.***

***382. Qofna ma aha qof dhameystiran oo ceeb ka saliim ah Dunidan. Hadii aad kaga fogaato dadka qaladaadkooda, waxaad weligaa keli ku ahaaneysaa Aduunka. Xukmi wax yar, Jeclow wax badan.***

***383. Qofna ma liito Balse, waxaa jira qof aan aqoon halka uu ku fiican yahay.***

***384. Qofna waxbixin kuma noqdo faqiir.***

***385. Qorrax-dhaca halkan waxay Qorrax soo bax u tahay dhinac kale oo Aduunka ka mid ah. Marnaba ha quusan sababtoo ah wax u muuqda dhamaad ayaa xaqiiqdii ah bilow cusub.***

***386. Raggu laba qolaba doorashadooda kuma fiicna. Dumarka/xaaska ma dooran yaqaannaan, cadowgoodana sidaas oo kale.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***387. Runta waa sida libaaxa oo kale uma baahna in aad Difaacdo, iska daa ha tagtee iyadaa ugu danbeyn is caddeyneysa.***

***388. Saaxiib waxaa ugu wanaagsan qofka Alle ku xusuusiya. Kheyr kula jeclaada. Marnaba aan dambi kuu horseedin ama kuugu yeerin.***

***389. Saaxiibada aad leedahay saddex nooc ayay u kala baxaan: B) Kuwa ku caawiyay waqtigi aad dhibka ku jirtay. T) Kuwo kaa tagay xilligi dhibaatada ku heysatay. J) Kuwa iyagu dhibta ku gashay.***

***390. Saaxiibada beenta ah waa sida Harka (hooska) oo kale had iyo jeer waa kula socdaan xillga aad iftiinka ku jirto, balse ma arkeysid saacadaha aad mugdiga (dhibka) ku jirto.***

***391. Saaxiibada qaarkood waa sidii lacagta faalisadaa oo kale lama garto ilaa marka ay baahi timaado.***

***392. Saaxiibka dhabta ah wuxuu xaqiiqdii kuu yahay Hantidaada nolosha. Si daacadnimo ah ayay kuu saxaan, kuu hagaan, kuuna taageeraan. Wehelkoodu wuxuu ku xusuusinayaa in aadan marnaba keli ku ahayn dunidan.***

***393. Saaxiibka dhabtaa ma ahan kan kuu qariya ceebtaada si uu u helo Raali Ahaanshahaaga.***

***394. Saaxiibka wanaagsani waa hanti.***

***395. Saaxiibtinimadu ma aha qofka aad waqtiga ugu dheer taqaanay. Saaxiibku waa qofka intuu kuu yimaado ku***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

***yiraahdo; anigaa halkan kuu jooga oo ku garab taagan, ficilna ku cadeeya.***

***396. Sababta aan wax u qoraa kaliya waa dareenka I gubaya. Haddii aanan qori Lahayn, maan awoodeen in aan xasiLooni helo.***

***397. Saburku ma aha ilaa waqtiga aad sugi karto, balse waa sida wanaagsan aad u dhaqmi karto inta aad sugeyso. Marnaba ha is oran way kaa daaheen wixi aad sugaysay ama weligaa ma helaysid.***

***398. Sadaqadu waxa ay ka biLLaabantaa Guriga, Laakiin ma aha in ay guriga ku eekaato.***

***399. Sadaqu waxa ay ka bilaabantaa Guriga, caddaaladduna waxa ay ka bilaaban taa Al-baabka Ku xiga Al-baabkaaga.***

***400. Saddex Xal ayay leedahay dhibaato kasta: U sabur, Wax ka qabo, Isaga tag. Hadii aadan u saburi karin, wax ka qabo, hadii aadan wax ka qaban karin, Isaga har oo faraha ka qaad.***

***401. Samayso dad kuugu dhiiri galiya inaad wax noqoto ooh an iyo himiloba leh***

***402. Saxuunta Dahabka ka sameysan marnaba Madow ma noqdaan.***

***403. Seeska wax kasta oo qaayo Lehi waa aaminidda nafta iyo ogaanshaha cidda aad tahay.***

***404. shaqo kasta oo aad haysid raadi wadada ugu fudud oo lagu dhamaystiri karo, horayna kaga dhaqaaq.***

***405. Sharafta iyo karaamadu dhib la'aan kuma waaraan illaa dhiig lagu sadqeeyo.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***406. Si aad u guuleysato, rabitaan kaaga guusha waa in uu ka weynaadaa cabsidaada guuldarada.***

***407. Si kasta oo uu u xumaado xidhiidhka aad la leedahay qof mar hore aad hadyad siiysay dib ha ugagga noqon.***

***408. Si taxadar leh u dhageyso sida qof u hadlo kolkuu qof wax kaaga sheegayo qof kale. Tani waa sida ay kaaga waramayaan markey dad kale kaala hadlayaan.***

***409. Sida aad doonto u quruxbadnow balse haddi dadnimadaada arag xun tahay, waa aad arag xun tahay.***

***410. Sida keliya ee waxa weyn Lagu samayn karaa waa in aad jecLaato waxa aad qabanayso.***

***411. Sida loo xusho saaxiib fiican sanadahan dambe; Haddii saaxiibkaa ku hilmaansiiyo mobile-ka in aad eegto waa saaxiib fiican, laakiin haddii aad mobile kaga mashquusho waa adigoo qolkaaga cidlada ah ku jira oo kale.***

***412. Sidee bay ii weydiin karaan in aan xirto Ciidan oo aado lix & toban kun oo Kiilomitir meel gurigeyga u jirta ka dibna aan bambooyin iyo xabad la dhaco dad midab bunni ah leh oo Vietnan ku nool kolka dadka Madow aan ka dhashay ee Louisville ku sugan loola dhaqmo sida Eydi loona diido xuquuqdoodi bini'aadanimo?***

***413. Sidoo kale, Aduunku halkiisa ayuu u joogaa dadka oo dhan.***

***414. Sigaar ma cabo balse taraq ayaan jeebka gashadaa. Goortii Qalbigeyga u janjeersado Dambi inaan sameeyo, taraqaan daaraa, gacanteydaan ku gubaa, si aan ugu kululeeyo. Ka dibna nafteydaan ku iraahdaa "Cali kuleylkan yar xitaa uma adkeysan kartid, sidee ugu dulqaadan kartaa Kuleylka aan loo adkeysan karin ee Naarta.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***415. Sirta noloshu ma'aha in aad samayso waxa aad jeceshay, balse waa in aad jeceshay waxa aad qabanayso.***

***416. Sonkor iyo cusbo wey isku qasmikaraan lkn xitaa #Quraanjadu weydiidaa cusbada wexeyna qaadataa kaliya sonkorta.Dooro lasocodka dadka wngsn kana dhig noloshaada mid maxaan.***

***417. Talada fiican waa mid la hubo in had iyo jeer layska indha tiri doono, laakiin taasi ma aha sabab loot ala bixin waayo.***

***418. Tijaabada ugu weyn ee lagu qiyaasi karo geesinimadu waa qofka oo la eego sida uu ugu adkaysto guuldarrada iyo jabka, lana hubiyo in aanay ku ridin niyad jab iyo mooral xumo.***

***419. Toban hab oo aad jacayl ku kasban karto: Dhegeyso, Hadal, bixi, Xidhiidhi, jawaab, Wadaag, raaxayso, Ku kalsoonoow, Cafi, ballan-qaad.***

***420. Tartanka aad lagasho dad ka kaa hooseeya , hoos ayuu kuu dhigaa , Tartanka aad Lagasho Dadka kaa sareeya , sarre ayuu kuu qaadaa.***

***421. Tus Xushmad xitaa dadka aan u qalmin; Ma aha ka falcelin dabeecadooda, laakiin waa sawir ka bixin adiga dhaqankaaga qadarinta ku dhisan.***

***422. U duul dayaxa haddii aad awoodi waydid waxaad dagaysaa xidigaha.***

***423. U la dhaqan dadka sida aad jeceshahay inay kuula dhaqmaan.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

***424. U Sabir xaasidkaaga, waayo sabirkaaga ayaa dilaya, soo ma ogid in haddii uu dabku waayo wax uu cuno isagu is cuno aakhirka.***

***425. ugu yaraan maalintii ku dadaal inaad heshowaqti aad ku dhiiri galiso naftaada, tusaale ahaan daawo videos dhiiri galin ah ama dhagayso qisooyin.***

***426. ula dhaqan dadka sida aad jeceshahay inay kula dhaqmaan.***

***427. Uma baahna awood weyn in aan wax sameyno, laakiin waxa ay u baahan tahay awood weyn oo aan ku go'aan sanno in aynnu sameyno.***

***428. Waa ay adag tahay in aad jeclaato qof aad si fiican u wada taqaanno, waayo waxa la jeclaadaaba waa qofka intiisa qarsoon.***

***429. Waa ay fiicantahay in qofku uu mar kasta lahaado dareen bani'aadamnimo oo la xanuunsada dhibta haysata dadka ku xeeran, laakiin waa in aanu ka tegin taxaddarka, gacantiisana aanay ka bixin xakamaynta qiiradiisa***

***430. Waa caafimaadka waxa ah hantida dhabta ah ee ma aha xoogaa dahab ah ama lacag ah. Lacagtu waxay kuu iibin karaan sariir qaali ah laakiin kuuma iibin karto hurdo iyo si nabad ah inaad ugu seexato. ku dedaal daryeelka naftaada.***

***431. waa gar in aynu mabda'yadeena ku taagnaano, oo ku dhaqaaqno. Balse ma aha gar in aynnu si indho la'aan u haysano ama aynnu ku sii dhagnaanno marka ay cadaato in ay khaldanaayeen.***

***432. Waa Iimaan la'aanta waxa ka dhiga dadka inay ka cabsadaan wajahida dhibaatada iyo loolanka Nolosha. Anigu Alle ayaan Aaminsanahay, Nafteydana waan ku kalsoonahay.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***433. Waa iimaan yaraan iyo kalsooni-darro waxa ka dhigta dadka in ay ka baqaan nolosha iyo waayaheeda, aniguna waan isku kalsoonahay.***

***434. waa in aynaan ku dhegnaan in ay noloshu noqoto sidii aynu qorsheynay oo keliya, si ay innoogu fududaato aqbalidda ta ina hor taal.***

***435. Waa inaa qaadataa jaanis, sameesaana jooys ama doorasho, iyo isbeddel nafeed.***

***436. Waagi hore Deris waxaa ugu xumaa kan ku yiraahda Dooradaada iga cesho, Waayadan dambe Deris waxaa ugu xun kan Password ku xirta Internet Wifi-kooda.***

***437. waddamada yar yar waa sida gabar aan si hufneen u labisanayn. Waxa duufsada kuwa shar wadaynayaasha ah .***

***438. Wanaag ku bedel xumaan kasta, dhoola cadee goortii aad murugeysan tahay, ku qanacsanow halka aad joogto iyo waxa aad heysato. Had iyo jeer cafi cid kasta. Ogow dadku way is bedelaan, qaladaad waa dhacaan, laakiin xusuusnow noloshu waa soconaysaa.***

***439. wanaag qabo Abaal marinna cidna haka sugin, waa sirtra guusha iyo dadka garaadka leh.***

***440. wanaaji xiriirka aad ilaahay la lee dahay waayo guul xumada ugu horaysa ee nolasha waxee ka bilaabantaa in qofku ku guul daraysto inuu la xariiro ilaahayga uumay.***

***441. Waqti iyo hadal badan haku lumin dadka u qalma kaliya in aad ka aamusto.***

***442. Waqtiga iyo duruuftu way is bedeli karaan xilli kasta.***

***443. Waqtigu wuu ku gaabiya kuwa suga,wuu ka dheereeya kuwa ka baqa, wuu ku dheeryahay kuwa murugooda, wuu ku***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

***gaabanyahay kuwa faraxsan, laakiin kuwa jecel waqtigu wa daa'im.***

***444. Wax badan aqriso si wax badan aad u ogaati.***

***445. Wax bixintu waa arin ku xidhan qalbiga, ha dhihin waxa ay ku xidhan tahay Xoolo badni.***

***446. Wax kastaba oo dhalaalaya Ha raacin! Sababtoo Ah.. Dabkuba wuu Dhalaalaa.***

***447. Wax kasta oo daciif kaa dhiga muuqaal ahaan, maskax ahaan & caqiido ahaan he yeelin oo ha qaadan waa Sun.***

***448. Wax wanaagsan ayaa noqon kara wax xun hadii aad ka eegto dhinaca mugdiga ah. Wax xun ayaa noqon kara wax fiican hadii aad ka eegto dhinaca iftiinka ah.***

***449. Wax wanaagsan ayaa u muuqan kara xumaan hadii dhanka mugdiga ah ka eegto, wax xun ayaa u muuqan kara wax wanaagsan haddii aad ka eegto dhanka iftiinka ah. Sida dadku wax u arko ama u cabiro ayaa kala duwan.***

***450. Waxa aad ku dadaashaa in aad bixiso hadyadda Cimriga dheer leh, halkii aad casho ama Sharaab qof uga qaadi lahayd uga iibi shay sida, Shaadh, toob, Saacad, Kabo, Qalin IWM.***

***451. Waxa aad leedahay fikrado aniguna waxa aan lee yahay fikrado ii gooniya. Tani waa xaqiiqada waxna kama beddeli kartid xitaa haddii aad I disho.***

***452. Waxa Boon-bale iyo alaab Aduunka yaal si loogu dheelo, dad qaarkii waxay doortaan inay ku ciyaaraan dareenka dadka.***

***453. Waxa jirkeyga u soo dhibtooday una soo adkeystay way u qalantaa wixi aan gaaray Nolosha. Qofka aan lahayn geesinimo ku filan uu ku wajaho khatar kasta oo ka hor timaada marnaba ma gaarayo wax guul ah Nolosha.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***454. Waxa ugu fiican uguna quruxda badan adduunka Lama arki karo Lamana taaban karo - waxa laga dareemaa qalbiga.***

***455. Waxaa fiican inan wax u cuno si aan u noolaano laakiin aynaan u noolaan si aan wax u cuno..***

***456. Waxaa jira hadalo u waxyeela Qalbiga si ka daran Seef lagu dhuftay, waxaa jira hadalo qofka ku noqda waran kaga taagan wadnaha noloshiisa oo dhan. Ka taxadar hadalada aad dadka kula hadleyso.***

***457. Waxaa jira wadooyin badan oo horay loogu socon karo laakiin waxaa jira hal wado oo aad ku nagaan kartid.***

***458. waxaa La rabaa inay diyaar noo ahaato god aan ku duugno khaladaadka ay naga galaan dadka noo dhow dhow.***

***459. waxaad qaban kartid hadii aad ku Ekaatid marnaba dhaafi maysid waxaad tahay.***

***460. waxaad samaynayso qiimo ku dar saad u guulaysato.***

***461. Waxaan ka baryay Alle in uu i xafido igana ilaaliyo cadowgeyga, durbadiba waxaa bilaabatay in aan waayo saaxiibadi xumaa.***

***462. Waxaan ka xiran karnaa indhaha waxyaabaha aynaan rabin in aan aragno laakiin kama xiran karno qalbigeena waxyaabaha aynaan rabin in aan dareeno. Aad bay daruuri u tahay inaan xushmayno dareenka dadka kale.***

***463. Waxaan necbaa daqiiqad kasta Tababarka, Laakiin waxaan nafteyda ku oran jiray, Ha joojin. Hada dhibaato badan ha ku gaarto ka dibna u Noolow inta cimrigaaga ka dhiman adigoo ah Horyaal Guuleystay.***

***464. Waxbarashadu ma aha barashada xaqiiqooyinka, Laakiin waa u tababarka maskaxda sidii ay u fakeri lahayd.***

***465. Webiga ma qarqin Nabi Muuse CS isagoo ah saqiir kuna sugan xaalad uu aad u tabar daran yahay.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***Hadana Webiga wuxuu qarqiyay Fircoon isagoo ku sugan xilligi uu ugu awooda badnaa! Kibir dartiisna uu sheegtay in uu Bini'aadan oo dhan ka sareeyo!!.***

***466. Weligaa Saca geesaha weyn hortiisa ha istaagin, dameerkuna gadaashiisa ha istaagin laakiin qofka nacaska ah labadiisa dhinac iska ilaali.***

***467. Wiil Dhalinyaro ah ayaa su'aalay oday weyn, "Waa maxay Romance" Caaqilki ayaa ugu jawaabay, "Romance waa in aad reer yeelato, mas'uuliyad weyn isa saarto, ka dibna Reerkaaga aad u shaqeysato".***

***468. Wiilashu inta badan ma gartaan sida wax yar oo ay sameeyeen ama yiraahdeen u dhaawici karo dareenka iyo qalbiga gabadha.***

***469. Will ayaa Hooyadii weydiiyay: "Sidee baan u heli doonaa haweenayda Saxda ii ah?***
***Hooyadii ayaa ugu jawaabtay. "Ha ka welwelin helida haweenay sax ah, xooga saar sidi aad u noqon lahayd Ninki Saxda ahaa".***

***470. Wixi aan ka helno waa wixi aan isku dayno!!.***

***471. Xanaaqu waa dareenka ka dhiga afkaagu in uu aad ushaqeeyo si ka dhaqso badan maskaxdaada. iska jooji carada.***

***472. Xaq uma lihin in aynu fekrad dhiibano ilaa aynu ka jawaabi karno dhammaan su'aalaha fekraddaas ka immaan kara.***

***473. Xaqa sheeg aad saaxiibba weydid ee.***

***474. Xasuuso, arxaddu kuma xirna qofka aad tahay ama waxa aad haysato, Waxa se4 ku xiran tahay waxa aad ku fakireyso.***

***475. Xidigaha ma eegtaa xasuus ma isku aragtaa xiliyada ma tirisaa waan kala xayiranee sidaan kuu xasuusanahay dhab ma igu xiistaa.***

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

***476. Xiriirku kuma xirna Da'da, masaafo fog, isu dhowaansho, kala maqnaansho iyo in la is waco daqiiqad kasta maalinti. Waxaa muhiimka ah waa in la helaa Aaminaad iyo daacadnimo. Aaminaada gabadhaha ee ninkeeda iyo Daacad ahaanshaha ninka ee gabadhiisa.***

***477. Xiriiro badan ayaa burbura, sababtu ugu weyn ma aha Jaceyka oo meesha ka maqan, Jaceylku had iyo jeer waa joogaa, Balse dhibka jira ayaa ah Qof ayaa keligii aad wax u jeclaada, halka qofka kale isaga jiray ciyaar iyo qiyaali.***

***478. Yaysan ku niyad jabin haddii dadku diidaan in ay ku caawiyaan. Xusuuso hadalki Einstein: "Waxaan u mahadcelinayaa dadki igu yiri 'MAYA' sababtoo ah iyaga dartood ayaan Aniga nafteyda u qabsaday waxaana joojiyay isku haleyntoodii".***

***479. Yeelo Saaxiib iyo Asxaab laakiin Ha hilmaamin Dadki Aduunkan ku keenay oo ku soo saaray, Xusuusnow in ay ku sugayso in aad Dad koriso, tababarto, heerna gaarsiiso, Xiriiri qaraabada, Xaq-dhawr Deriska, Xushmee dadka.***

***480. Yeydu waxa ay ku xad gudubtaa qofka aan Ey lahayn.***

## Murti Saddexleey ah.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

**Saddex Weeye Guurku:**
B) Badhi badhi ku dhufo.
T) Badhi dab ku dhufo.
J) Dab dab ku dhufo.

**Saddex Lama Arrag:**
B) Badhi Ciyi ah
T) Bellaayo laba qadah.
J) Bakayle Tallaabsanaya.

**Saddex Laguma Gallo:**
B) Barqin aan caanno lahayn.
T) Billad aan boqor lahayn.
J) Banaan farras lahayn.

**Saddex Derriskaa Kugu Neceb:**
B) Been baddan.
T) Baryo baddan.
J) Bukaan baddan.

**Saddex Rabi baa kuugu Naceb:**

B) Salaad la'aan.

T) soon La'aan.

j) Saddaqo la;aan.

**Saddex Dadkaa kuugu Naca:**
B) Baryo baddan.
T) Baahi badan.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

J) Bukaan badan.

**Saddex Lallama Heshiiyo:**
B) Taxde Waddaad ah.
T) Talliye Jiite ah.
J) Turqato Naageed.

**Saddex Baa Dumar lagu Qabay:**
B) Xil-kasnimo.
T) Xog ogaal.
J) Xan La'aan.

**Saddex Baase Baddellay:**
B) Xilma saarna.
T) Xaal ma qabto.
J) Xerro ma leh.

**Saddex Kuma Daryeesho:**
B) Dumaal haween.
T) Doqon sokeeye.
J) Dal shisheeye.

**Saddex Lagama Xishoodo**:
B) Dantaada raac.
T) Dirrir caddaawe.
J) Deeq lagu siiyo.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

**Saddex Dumar Ha Laga hello:**
B) Dawliid qurxoon
ha laga hello.
T) Dabeecad fiican
howudhallato.
J) Dad aqoon leh ha
noqoto.

**Saddex Lallamma Dego:**
B) Doqon fiiro taqaan.
T) Fulley daandaansi yaqaan.
J) Bakheyl damac badan.

**Saddex Berriga ayaa laga Hellaa:**
B) Beer.
T) Belled.
J) Baabuur.

**Saddex weeye Doqontu:**
B) Duufley.
T) Darreenley.
J) Dirashallay.

**Saddex buu Hoggaamiyuhu u baahan yahay:**
B) Caqli.
T) Maal.
J) Samir.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi
(maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

**Saddex Lallama saaxiibo:**
B) Run ma yaqaane.
T) Rabbi ma yaqaane.
J) Rag ma yaqaane.

**Saddex baa Rag ugu Liita:**
B) Ma Toshe.
T) Ma Tashiishe.
J) Ma Tashadde.

**Saddex Lama Raaco:**
B) Ma horreeye.
T) Ma dambeeye.
J) Ma haasaawe.

**Saddex Dumar baa ugu Wanaagsan:**
B) Mid kaa toostay.
T) Mid kulla toostay.
J) Mid kuu toostay.

**Saddex Baa Rag Ugu Daran:**
B) Ma dhigte.
T) Ma dhaqde.
J) Ma dhaggeyste.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

**Sadddex Badda ayaa lagga Hellaa:**
B) Markab.
T) Doon.
J) Kalluun.

**Saddex Raggu waa uu ka Simman yahay:**
B) Maggaca.
T) Magta.
J) Muuqa.

**Saddex Baa Ba’ay:**
B) Malle ba’ay.
T) Maggac ba’ay.
J) Maal ba’ay.

**Saddex Ma Dhaqmaan:**
B) Geel aan qawsaar lahayn.
T) Qabiil aan maddax lahayn.
J) ARi aan qawmiirte lahayn.

**Saddex Baa Rag Ugu Wannaagsan :**
B) Nin tolkii u naccas ah.
T) Nin shisheeyaha u naccas ah.
J) Nin reerkiisa u naag ah.

**Saddex Baa Rag ugu Darran:**
B) Nin maqan oon la tebin.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

T) Nin jooga oon la tirsan.
J) Nin tagaya oon la cellin.

**Saddex–Saddex Lamma Heshiiyaan:**
B) Nin quudh Jeccel iyo Nimaan u quudhin.
T) Nin qab-weyn iyo Nimaan u qabin.
J) Nin qosol baddan iyo Nin quusi maad baddan.

**Saddex Way ku Hoddaa:**
B) Gardarro garrab og.
T) Gaajo gurri og.
J) Gabow geeri og.

**Saddex Baase Suldaanimo ku Siisa:**
B) Gar toosan.
T) Gaccan furan.
J) Guddoon addag.

**Saddex Midna Faa'iido Ma Leh:**
B) Fidhiqle rag.
T) Fudeeyd haween.
J) Fadhiya geel.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

**Saddex baa Rag Kaa Rimin Jirray:**
B) Wax jooga ka haddalkii.
T) Wax teggay ka hadhidii.
J) Wax soo socda ka halloosigii.

## Saddex Aya Raga lagu Barta:
B) Sooryo ma wada cunteen?
T) Safar ma wada gasheen?
J) Meel ma wada seexateen?

## Saddex baa la yidhi:

B) Lixdan jir Lex jeclo ha la wadaagin

T) afartan jir ha la garrtamin.

j) labaatan jirna ha La Leggdemin.

## Saddex Ilaah waa karaa, mase suurowdo:

B) Ilaahow guursan maayee wiil i sii.

T) Ilaahow shaqaysan maayee xoolo i sii.

J) Ilaahow ku caabudi maayee jannada i gee.

**Saddex lama arag:**

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

B) Marti nin ka yar.

T) muddo maalin ka yar.

J) salaad ragcad ka yar,

**Saddex markaan bartaan ka gaboobay:**

B) Dab ollolintiisa.

T) carruur aamusinteed.

j) awr carraabintiis.

.

**Saddex wer-werkay kugu kordhiyaan haddana saddexdaas baa kaa baabi'ya.**

B) Faraska xun.

T) Naagta xun.

j) hoyga xun.

## Saddex col baa jira:

B) col cad = waa biyaha,

T) col cas = waa dabka

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

j) col madaw = waa dadka.

**Saddex Baa magaaalo lagu joogaa.**

B) Maro kaabadan.

T) Maal kaa badan.

j) Minin kaa badan.

**Saddex saddex baa lagu gartaa.**

B) Qofka dulqaadka badan waxaa lagu gartaa marka uu xanaaqo.

T) Saaxiibka runta ah waxaa lagu gartaa waqtiga baahida.

j) Geesiga waxaa lagu gartaa xilliyada dagaalka.

**Saddex ilaaheey baa laga magan galaaa.**

B) Qalbi aan qushuuc Laheyn.

T) Duco aan La Aqbalin.

J) Cilmi aan laga intifaacayn.

**Saddex baa saddex Laga hormariyaa.**

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

B) Geediga sahaydaa laga hormaryaa.

T) Guri deriskaa laga horumariyaa.

j) Dadka saaxiibkaa laga horumariyaa.

**Saddex Dadkaada bee kaala dhaxeesaa.**

B) Dad kaaga mar cadow gaa laga celiyaa.

T) Marna waa la is kaceliyaa.

j) Mar iyagaa la kala celiyaa.

**Saddex baa qofka muslimka ah Laga doonayaa.**

B) Xiriirinta ruuxa Cilaaqaadkiisagooya.

T) Wax siinta ruuxa adeega.

j) Cafin ta ruuxa muslimka ah.

**Saddex daan Nin waligaa ha noqon.**

B) Nin xaaraancun ah .

T) Nin xaasid ah.

j) Nin xanlow ah

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

**Saddex**

B) Xilo la’aan

T) Xishoodla’aan

j) Xoolo la’aan.

## Murti Todobo leey ah.

### Toddobo qofka ayay madaxtinimada u diidaan.

b)Diin la’aan.

T)Bakheyl nimada.

J)Fuleynimada.

X)Kibirka.

kH)nacasnimadda.

D)Talo-geka.

R)Deg-deg siimadda.

**Toddobo waa toddobo.**

B) wax kastoo yar waxaa ugu yar yaqiinta.

t) wax kastoo Aada waxaa ugu badan shakiga.

j) wax kastoo la ilaawo waxaa ugu ilaawsho dhow wanaaga xumaan laga daba mariyey.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

x) wax kastoo dheer waxaa ugu dheer adduunyada marka dhinaca aakhiro Laga eego.

Kh) wax kastoo dhow waxaa ugu dhow aakhiro marka laga dhinaca aduunyada laga eego.

R) wax kastoo qaboow waxaa ugu qaboow saama xaadda.

**Toddobo xaq aye afda nin keeda ku lee dahay.**

B) in uu marasho iyo masruuf siiyo.

T) in uu san afar bilood ka baddan ka maqnaanin.

j) in uu san gogosha mooyee wax kale ku dilin.

X) in uu san duburka uga tagin.

Kh) in uu san u diidin meherkeeda.

R) in uu diinta wax ka baraa hadii uu ku dhaamo.

Toddobo baa Dabka laga faaidaa.

B) in wax lagu karsado.

T) in la isku daaweeyo.

J) in xoolaha lagu sunto.

x) in lagu waano qaato kuleel kiisa.

Kh) in dharka iyo jirka lagu ENGejisto.

R) in wax lagu iftiinsado.

**Toddobo Aakhiro ayeeey marag furan.**

B) Malaa'ikta alle.

T) Dhulka.

J) waqtiga.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

X) Carabka.

Kh) labada malag ee garbahaada saaran.

D) diiwaanka.

R) Lixaadka.

**Toddobo lalama tashado.**

B)Jaahil.

T) cadow.

j) xaasid.

x) Doodaa.

Kh)fuley.

D) Bakheyl.

R) Damac badane.

**Toddobo wax yaabood ayaa laga dhaxlaa galmadda baddan.**

B) korka oo ku nusqaama.

T) xoogaaga oo daciifa.

J) jalaqleyda oo ku qalasha.

x) seedahaaga oo ku daciifa.

Kh) midibkaaga oo qayirma.

D) maskaxdaada oo yaraaata.

R) si yar oo ruuxdaada u baxdo.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

**Toddobo weeye dhaqanka wanaagsan**

B) carab runlow ah.

T) gudasho amaano.

j) xiriirinta qaraabada.

x) Gudida abaalka.

Kh) Dhawrista deriska.

D) marti gelinta.

R) xishoodka.

**Toddobo ayay haweeneyda doontaa in nin keeda noqdo.**

B) in uu ugu qurux badnaado Raga oo idil.

T) in uu ugu maal badnaado.

j) in uu ugu deeqsi sanaado.

X) in uu ugu geesi sanaado.

Kh) in uu ugu dabeecad fiicnaado.

D) in uu ugu Xoog badnaado.

R) in uu noqdo mid ay ka adag tahay oo ay maamusho.

**Toddobo meelood ayeey wanaagsan tahay in gabadha u weey naato.**

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

B) Labada cududood.

T) Labada bowdood.

J) Barrida.

X) kubabka.

Kh) joogga.

D) Garbaha.

R) Feeraha.

**Toddobo ayeey gabdhaha in ay u yaraadaan wanaagsan tahay.**

B) Labada cagood.

T) Sanka.

j) Dhexda.

X) Hunguriga.

KH) Afka.

D) Horaadada.

R) Labada gomadood (Anqaw).

**Toddobo waa isku Lid.**

B) Sir iyo Naag.

T) Aamus iyo Naag.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

j) QAnaaco iyo rag.

x) Run iyo rag.

Kh) Xasil iyo naag

D)Da’ iyo Naag.

R) Maal iyo naag.

## Murti sideed leey ah.

**Siddeed weeye Adduunyadu:**

B) Bilowgeeda waa daal.

T) Dhamaadkeedu waa ka tegid.

j) Xallaasheedu waa xisaab.

X) xaaraanteedu waa ciqaab.

Kh) Qofkii ku hodma waa fidnoowaa.,

D) qofkii eega wey ka jeesataa.

R) Qofkii ka jeestana wey Eegtaa.

S) qokii ku faqriya wuu ku murgaaa.

**Sidded weeye Guurka.**

B) Mako-nimeey guurso, waa Naagta isku filan ee kartida leh.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

T) Basari kibir guurso, waaa naaagta Quruxda baddan , baalidase ah.

J)Bahal caano sida Guurso,waa Naagta foosha xun Laakiin bayaxowga ah ee Nasiibka baddan.

X) Dil guurso, waa Naagta carmalka ah ee wiilasha leh

Kh) Dood guurso, waa Naagta Reer sabool ka dhalatay.

D) dulan guurso, waa Naagta Reer Laan-gaab ah ka dhalatay ee Cuqdada baddan.

R) LAbo dameer mid guurso, waa Naag wadatta hal inan oo ay dhashay.

S) LI dhawaaq aan ku dhamee guurso.

**Sideed sideed kale Hala wadaagin.**

B) Toban jir hala caaytamin.

T) Labaatan jir sahay ha ku darsan.

J) soddan jir hala baratamin.

X) afartan jir hala legdemin.

KH) konton jir hala gartamin.

D) LIxdan jir Lexjeclo ha tusin.

R) Todobaatan jir Towbad keen ha ku wacdiyin.

S) sideetan jir sacab maran ha u taagin.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

**Sideed waxaa Lagu xushaa Hogaamiyaha.**

B)in uu deeqsi yahay.

j) in uu shara lee yahay.

x) in uu dulqaad badan yahay.

Kh) in uu Samir badan yahay.

D) in uu kibir badneen.

R) in uu geesi yahay.

S) in uu dhawrsan yahay.

# Murti Sagaaleey ah.

**Sagaal xayawaaan ayey haweenku dabeecadda kaga egyihiin.**

B) Abeeso:waa mid hadal jilicsan qaniiinyo kulul, waayo abeesadu korkeedu waa jilicsan yahay sunteeduna wey daran tahay.

T) Doofaarka: waa mid Cunta cunis baddan marka ay carootana weelasha jajabisa.

j) BAqasha: waa mida madax adage e Rayigeeda la dhacsan isla quman.

X) Dibqalooca: waa mid darisyada ku wareegta ee isku dirta.

Kh) Dooliga: waa mid jeebka Nin ka farata (Baarata) ee xada.

D)shimbirta.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

**Sagaal xaq ayuu Ninku xaaskiisa ku leeyahay.**

B) in aanay Ogolaansho La’aan Guriga uga bixin.

T) in aanay isu Diidin Hadday Daahir tahay.

J) in aanay Maalkiisa qiyaamin.

X) in ay la duceesato.

KH) in aanay ku qaylinin.

D) in ay waxay awooddo ku caawiso.

R) in ay Maalkeeda ku Galladaysan, karto.

S) IN ay Ehelkiisa sharafto.

Sh) In ay maalke3eda u diidin.

***SagaaL waxyaabood ayaa lagu kibraa.***

B) Cilmiga.

T) shaqada.

J) Nasabka.

x)Cibaadada.

Kh)Maalka.

D) Xoogga.

R) Laandheerinimada.

S) walaalo badnida.

## Mirti Toban leey ah

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

**Toban naagta waa in nin keeda kula dhaqantaa.**

B)Waa in ay in dhihiisa dhowrtaa, si Aanay wax xun u arag.

T) waa in dhagihiisa dhowrtaa, si ay wax xun umaqlin.

J) waa in ay maalkiisa dhowrtaa, oo ay dhaqaalaysaa, qof uusan raali ka ahayna ay siinin.

X) waa in ay Ehelkiisa dhowrtaa, ixtiraamtaa soona dhaweysaa.

Kh) waa in ay caruurtiisa dhowrtaa, xanaaneesaa , hortiisana ku dilin.

D) waa in ay jiifkiisa dhowrtaa, oo ay u gogoshana u saxartirtaa, dhar qafiif ahna kula joogtaa.

R) waa in ay sankiisa dhowrtaa , oo uusan wax xun urin, isuna udgisaa.

**Toban ku dadaal.**

B) Xaqa u hiilli.

T) xalaal cun.

J) Xaaraan iska ilaali.

X) xurmee islaamka.

Kh) Xukun Naftaada.

D) Xifdi quraaanka.

R) Xigmada ku Dadaal.

S) xiriiri qaraabada.

Sh) xAntana ka dheeroow.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Dh)Xishoodka ku dadaal.

**Toban weeye Asluubta u dhaxaysa Ilmaha iyo waalidkooda.**

B) waa In uu hadalkooda maqlaa.

T) waa in marka ay istaagaan uu la istaagaa.

J) waa in uu kaalintooda buuxiyaa.

X) waa in uu san horsoconin.

Kh) waa in uuu san indhaha ku gubin oo uu san wejigiisa wejigooda u dhameyn.

D) waa in uu san hadalkiisa ka hormarin hadalkoooda.

R) waa in uu bajiibaa marka ay u yeeraan.

S) waa in uu ku dadaalaa wixii raali gelinaya.

Sh) waa in uu dhimriyaa.

Dh) waa in uusan ugu abaal sheegan wanaaga uu u sameeyay iyo Amarkooda qaatay.

**Tobanka Shimbirood ee Quraanka Lagu sheegay.**

B) Tukaha.

T) Ayaxa.

J) Shinnida.

X) Quraanjada.

Kh)Duqsiga.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

D) Balan baalista.

R) Abaabiilka.

S) Salwaha.

Sh) Kaneecada.

DH) HUdhudka.

## *MAAH-MAAHYO*

**Waa maxay mah-maahyo?**

***Mahmaah : waa qeeb ka mid ah hadalka , waxayna ka tirsan tahay suugaanta, sida : maansada, tixda, tiraabta, saarka, iyo sheekooyinka sida habeesan u qoran inta badan maah-maah yada qaafiyad bay leedahay xarafna wey ku socotaa.***

**Hadaba siyaaba ayaa loo adeegsadaa?**

- *Garnaqsi*
- *Kaftamid*
- *Xod-xodsho dumar*
- *Fikrad ka dhaahicin qof kale*
- *Digniinba*

*Ku soo dhawaada maah-maahyo xigmado xambaarsan.*

**Xarafka 'B'.**

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Baadi nimaan lahayn bay ag joogtaa.

Baahi qof kuu daran bay kuu geysaa.

Baareey guur, oo sixnigaagana la guur.

Baayac-mushtar bilowgiis waa bur iyo bajiye .

Baddu waa isku dhadhan.

Badhi mag ma laha.

Balaayo buulkaagaa laga galaa.

Balaayo laba qad ma leh.

Balaayo madax la qabtay leedahaye minjo la qabto ma laha.

Ballan habeenimo, jarmaado subax buu leeyahay.

Ballaysin bir ka adag.

Ban waraabo iyo gaala baqataba, baraa la helaa.

Bannaan kaba arkaayow maxaa babac ku saaraaya.

Bannaankiis mare maradiisa geed ma qabsato.

Baqal fardo la miratay dhigood bay is moodaa.

Barasho horteed dad ha nicin.

Barasho horteed ha i nicin.

Barasho u yeelo geedkaad cugsan doonto.

Bari waaga mooyee wax san kama yimaadaan.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Barrooriba buulkeeday ku hartaa.

Bartii yaqaan bar xoolaad kuma korodho.

Bartii yaqaan, bari uma korodho.

Baruur qudhuntay baa baruuro qudhmisa.

Baruuro sabool, badhaadhaa leh.

Baryo badan iyo bukaan badanba waa la isku nacaa.

Baryo iyo is daluuc layskuma daro.

Basari buulkeeda bayaayo waaye.

Baso waa baso si kastoo loo subko.

Bawdo rag, maalinba midbaa qaawan.

Been doode been buu dhaartaa.

Been fakatay runi ma gaadho.

Beeni raad ma leh.

Beentaada hore runtaada danbay u xuntahay.

Beentaada hore, runtaada dambey dishaa.

Beentaada hore, runtaada danbey u daran tahay.

Beer wax dhalow ba’.

Beerka jecli, xaydha jecli.

Belaayo aadan guriga keensan banana kaama raacdo.

Belaayo guur bay ku tiraahdaa ama guurso.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Belaayo hor la qabtay leedahay ee dabo la qabto ma leh.

Belaayo kaa sii jeeda la iskuma soo jeedsho.

Belo markay adiga kaa maqan tahay, qayrkaa bay ku maqan tahay.

Bidaari sibiq bay kugu gashaa.

Bilaysani Bir ka adag

Bililiqo doon waa nabad diid.

Bil-saddex reerkaagana waa kaa kaxaysaa, reer kalena kuuma geyso.

Bir baa bir goysa.

Birta adag dab ayaa lagu jilciyaa.

Bisayl iyo ceedhiin waxa u dhexeeya waa yac-yacood.

Bisqin rag bay kuu gaysaa ragse kaama celiso.

Biya sar tegey waa la sugayaa.

Biyahaan fiiqsi loo liqin, iyo hadalkaan fiirsi loo oran feerahay wax yeelaan.

Biyo ay horotood dhooqo tahay, dabadooda maxaad mooday.

Biyo gorore oo meel godan bay isugu tageen.

Biyo meel godan bay isugu tagaan.

Biyo sacabbadaadaa looga dhergaa.

Biyo socdaa biyo fadhiyey kiciyaan.

Boqol sano oo dawlad xumo ah, hal habeen oo dawlad la’aana baa xun.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Boraan hadimo ha qodin ku dhici doontaa mooyee.

Buubaal biyaha korkiisa saran buu ka didaa.

## Xarafka ‘T’.

Tabcadaa ma tuugoobo.

Talo adigaa ku nool ee iyadu kuguma noola.

Talo iskuma kaasheegto.

Talo laba adin dhexdood bay ka dhalataa.

Talo waalid diid tagoogo laga-jabo ayeey leedahay.

Tixsigu dantiisu qurunka ayuu kujiraa.

Tol la’aani waa toos.

Tol yarraaday, tafo naagood baa laga dayaa.

Toladu waa mar aad gaadhi waydo iyo mar aad garan waydo.

Tolkaa maw talisay, mase tuugtay.

Tolkaaga iyo xaaskaaga midna looma xoog weynaado.

Tuhun waa sed.

Tuug la qabtay tallo ma laha.

Tuug tuug ma xado.

Tuugmo bini aadam tuur bee kuu yeeshaa.

## Xarafka ‘J’.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Jaallahaa kuma jebiyo.

Jaallahaaa jaallihii.

Jawaan eber ah jid dheer haddaad mari, jiraab Sahay ku qaado.

Jid ma qaloocno ee jadiin baa qaloocan.

jiilaalku iyo Ninku wey Legdamaan, kolba ka naagtu nacdaa adag.

Jiljileec looma dhinto, ad adeygna laguma waaro.

Jinni Nin kii keenaa saara.

Jir aan ciyaarin waa caabuqaa.

Jir qalaad waa dhul qalaad.

Jir walaal walaal ma ah , ee jidiin baa walaal ah.

## Xarafka 'X'.

Xaasidow xoogga beel.

Xabaal qode xabaashiisaa la qodaa.

Xabaallo waalid baa xoolo lagala baxaa.

Xarko geel ma wada xidhaan.

Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan

Xalaafo waa Xoogii Xirsi Muude.

Xalaal iftiin baa la qashaa.

Xarrago dumar xanuun ma leh.

Xiiso iyo xoorba way gudhaan.

Xog mooge xaajo waa dilaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Xoog waxaa u Liita kii xariga kaa gooya.

Xoog hadaad waydo xeeled ma weydid.

Xoolo lama cunee dadkoodaa la cunaa.

Xoolo quudheed waa la qaataa, soor quudheedse lama qaato.

Xoorkii laga dhamay xagaagii iyo xusuus baa geel lagu xer geeyaa.

Xornimo adaa ku noole,iyadu kuguma noola.

Xumbo iyo xiiso way dhacaan.

## Xarafka 'D'.

Daacadi ma hungowdo.

Daah-daahow hortiis dafo waaye (Arrin degdeg u baahan lagama daaho).

Daawo tiro wax kuma tarto.

Dab aan ku gubin kulaylkiisa ma ogid.

Dab ama hadal baa lagu bakhtiiyaa ama biyo.

Dab iyo xanuun meel ma wada fadhiistaan.

Dab munaafaq shiday baa duul dhan guba.

Dab munaafaq shide muslim baa ku gubta.

Dab aan kuleelkiisa la arag danbaskiisa Lagama leexdo.

Dabada iiga qor anigaa durugsan doonee (Ma dhiirrado nin aan garab wax lagula dhisayn.).

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Daba gaale timir gaari waayey qaraara buu yiraahdaa’.

Dabalaay gooji ama ha goojin geela gu’ga dhalay uun baa lagugu tirin.

Dabeecad xuma dad kaa saartay.

Dabeecaddu diinta waa ka badh.

Dabkii baxayaa dab lagu qabsadaa.

Dacartuba mar bay malab dhashaa.

Dacas iyo dameeraba lama kala laha.

Dacas kaa weyni dhiiqaday kugu farjiyaan.

Dacawadii tallaabada nebiga ku dayatay, teediina ka taktay tu kalena gaari weydey.

Dacawo duul-duul badan af libaaxeey dalaq dhahdaa.

Dad iyo weel godanba waa la badsadaa (weelka godan biyahaa ku urura).

Dad kaa badan iyo biyo kaa badannba way ku hanfiyaan.

Dad wax ugu liita ma tashe, ma toshe, ma tashiishe.

Dad wax yar tare ma ahee, wax ma tare ma leh.

Dad waxa ugu muran badan jaxar iyo jaahil.

Dad waxa yaqaan nin tuugsaday iyo nin u taliyey.

Dad waxaa yaqaan nin tuugay iyo nin u taliyey.

Dadku hadalkay isku afgartaan xooluhuna urta.

Dadqal looma gurguurto.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Dagaal qofbaa ku dhintee qof kuma dhasho.

Dagaal wiil kuma dhashee, wiilbaa ku dhinta.

Dal aqoon la’aan waa la habaabaa, dad aqoon la’aana waa la qadaa.

Daleel marow maradiis geed ma daarow.

Dameer dhaan raac.

Dameer waa dameer sidii goodirkaba ha u boodee.

Dameeraha Adari qofkii oodda ka qaadaa aroorsa.

Dameeraha Awdal ninkii ooda ka rogaa arroorsha.

Dameeraha ta ugu xun baa ugu haraati kulul.

Dameeraha ta ugu yar baa ugu biqlo badan.

Dameeri dhaan raacday.

Dameer isku hallayn bay hooyadeed dabada uga nuuggtaa.

Dameero awdalan ninkii ooda ka qaadaa arooriya.

Dameertu geel-didiska khuruf-khuruftay kaga dartay.

Dameertu inta aanay cida baran ayey dhuusada barataa.

Dameertu isku halayn bay hooyadeed dabada uga nuugtaa.

Dameertu ma hadhsato ilmaheedana ma hadhiso.

Dammeeraley Dad la xeer ma aha.

Dan iyo xarrago is weyday.

Dan la iskuma naco.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Dani waa seeto.

Dani xishhod maleh.

Dantaada derin kar karan waa loogu seexdaa.

Dantaada iyo madaxaaga midna lagama boodo.

Dantaadana, maqaar eybaa loogu seexdaa.

Dantii mooge, maro duuga buu ka liitaa.

Dantu ceebba ma laha ee dadka uun ba isku naca.

Darandoorriyaaba naas-naasi (Nin ordaaba istaag.

Dar-daaran caweysin kallah arooryaad buu leeyahay (Arrin la qorsheeyey meel laga bilaabo ayeey leedahay.

Dar-daaran waa inta xayiga la yahay.

Dawaco geel ma cunto.

Dawaco meeshay macal idood ku baratay, macaluul ugu bakhtidaa.

Dawarsato dariiqay ku collowdaa.

Deero waa dal maddays.

Deriska dagaalkaaga raba, dooradaada ceshaa ayuu ku dhahaa.

Deriskaada marna ku dayo marna ku diin.

Dib u gurasho dib bay kuu dhigtaa.

Dibi hooyo xumi hore uma koro.

Dibi hooyo xumi korme ma noqdo.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Dibi hooyo xumi, hore ma noqdo.

Dibi, bay waw dhutiyaa.

Dii-diinku weelshee deymoodaa ka koriyee ma danbar manuujiyaaw = Diinku ubadkiisa eegmaduu ku koriyaa.

Dix dhaaxood dhagax ka waa, hayeesa hangool ka waa.

Dixrigu(duqsigu) dantiisuu qudhunka ugu jiraa.

Doc ka yeedh iyo dameerkaba daankaa la jebiyaa.

Doofaarka ficil la'aan baa loo cadaabaa.

Dooradaada iga cesho waa dagaal bilawgiis.

Dooro hadey hal waddo iyo hadey toban waddo **kurug, kurug** ma dhaafeeyso.

Dooro qoor qabasho biyo kuma cabto.

Dooro xaarka way wada cuntaa, af-tirashadeyse isku dhaantaa.

Doqon alle bariday xeradeeday ka aragtay.

Doqon dib bay wax ka garataa.

Doqon ha u gargaarin hana gargaarsan.

Doqon iyo habeen baa madaw.

Doqon milantay iyo geesi damac bartay dhexdoodaa miidaamo ka hacdaa.

Doqon nebi Muusaa habaaray.

Doqon qaddar alla taqaanna qulucdaada looma dhiibto.

Doqon sokeeye ma aha.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Doqoneey dabkaa ba.

Doqoni amaanay lahayn bay u rixisaa.

Doqoni cad ciid loogu riday , cay bay mooddaa.

Doqoni calaf ma leh.

Doqoni haddii la xifaaltamo in la is diriray bay mooddaa.

Doqoni hoosiis bay had mooddaa.

Doqoni meeshii la isku diriray uun bay ogeyd, meeshii lagu heshiiyese ma oga.

Doqoni qiiq kama kacdee daamankay meer meerisaa.

Doqoni saaf carro loogu riday, sad bursiinyo ma mooddo.

Doqoni waxay leedahay laba iyo toban indhood, hal mid bay waxay ku aragtaa.

Doqoni xarigga lagu xiri xusulladay ku sidataa.

Doqoni xin mooyiye, xisaab ma oga.

Doqonimo waa shil.

Doqonkii lumay oo la soo helay wuxuu yiri; “Maxaa la iiga farxi berriba waan lumiyee.

Doqonta usha agteedaa lagu dhuftaa haday garan waydana goshaa oo geshaa.

Doqontu afka xanbay ku sidaa ishana xil.

Doqontu hadalkay dib u gocotaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Doqontu marka la ficil tamayo in laka tagayo ayey moodaa.

Doqontu xeerna ma hoyso, xoolana ma hoyso.

Dudumo dheeraataa dhulkuun bay ku noqotaa.

Dudun dareen ii dugsasho inis ki dartooy = Dudun dareen iyo dugsasho,ha iskugudarin.

Dukhsi biyo ku dabaal bartay fuud buu ku bakhtiyaa.

Dukhsi dantiisuu dumurka (qudhunka) ugu jiraa.

Dukhsi dantiisuu dumurka ugu jiraa.

Dukulush timir deeri waayi Kharaaraa tuf in erre?.

Dul qaadasho yey noqon tii dibiga.

Dumaal nin ka xishooday kama ilmo dhalo.

Dumar iyo dheri toona yar yaraysi malaha.

Dumar kun bee shoowiyaan kow beey kala baxaan.

Dumar yaryaraysi male.

Dumarka been baa lagu soo xero geliyaa runa waa lagu dhaqaa.

Duqsi canuu ku dabaal bartaa , fuud buuse ku gubtaa.

Durduro geel baa ku jaba.

Durduro waxarood xanan(qodax) bay kula gashaa.

## Xarafka ‘R ’.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Raad arrooryo dib looma raaco.

Rag gar baa kala saarta dumarna jaan.

Rag hunguri buu isku raacaa.

Rag is ka celis iyo rabbi ka cabsi meel ma wada galaan.

Rag jidiin baa walaaleeya.

Rag la'aan waxba kuma yeeshee Rag xumaa ku disha.

Rag qawl baa xidha dumarna meher.

Rag sadex lama raaco, ma fakere,ma faaidayste,ma foorarsade.

Rag waa arin keen iyo aqbalkeen.

Rag waa raggii hore hadalna waa intuu yidhi.

Rag waa shaah dumarna waa sheeko.

Rag walaalow wuxuu ku dhaamo la waa.

Rag waxa ugu faan badan mar dhoof iyo mar duul.

Rag waxa ugu liita ciil kama baxe iyo calooshiisa la ciyaare.

Rag waxa ugu liita looma maahmaahe, looma sheekeeye, looma soo gale.

Rag waxa ugu liita, ma hadle ma heenseeye, ma haasawshe.
Rag wuxuu kugu bartuu kugu dilaa.
Ragi sadex bay ku kala baxaan , wax tegay ka hadhidii, wax jooga ka hadalkii, wax soo socda ka haloosigii.

Ragu sadex waa iskaga mid. Magaca, magta iyo maganta.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Ragu waxa uu ka sheekeeyaa bi'iisa dumarkuna baraara- hooda.

Reer ba'ow yaa ku leh!.

Reer guura raac iyo carruurba loo kala sheekeeyaa, is mase arkaan.

Reer, naagbaa kaa raacda.

Reerka meelan loo husan looma haatiyo.

Ri waalan ridaada laguma xirto.

Riyuhu lugtooday shalan ku doontaan.

Roob magaalo ku hooray ramaas soo bixin maayee laamiguu ku raftaan.

Run iyo ilkaba waa la cadeeyaa.

Run iyo roob lagama reysto.

Run rag kama nixiso.

Ruux aan geeri iyo nolol midna ahayni/ ma dhiman mana noola.

Ruuxba dhiishuu ruxduu caanaheeda dhamaa.

## Xarafka 'S'.

Safar waa si wada yeel.

Sagaaro intay tub joogto bay tub kale dayataa.

Sagaaro inteeda waa ku duq.

Sagaaro laba cad oo la kal qaado ma leh.

Sagaaro, mindhaa ima barato.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Sahaydaa waa hor, socodkaana waa dib.

Sakaaro laba tun oo laka qalo ma leh.

Salaadba waqtigeedaa la tukadaa.

Samraa, sammo hela.

San kaaga oo qudhma lama gooyo.

Seedi waa beer.

Si xun wax u sheege saaxir ka daran.

Sidaa isu taqaan ma ahee, waa sida laguu yaqaan.

Sidaan kuugu lisay iigumaad hanbayn.

Sidee xeego lagu xagtaa ilkana u nabad galaan

Sir ma qabe allaw sahana.

Sir ma qabe saabaa biyo u celiya.

Sir naageed lagama sal gaadho.

Sirtaada naag looma sheegto.

Sodcaal maa moodhar, sahayna waa lacag, saaxiibna waa kaba cad.

Soo bax baa la leeyahay sacabka leefaysaa.

Soo joog qofkii laga waayo, soo jiifaa laga helaa.

Soo joogso laga waayaa, soo jiifso laga helaa.

Soomaalidu been way sheegtaa beense ma maahmaahdo.

Soomaalidu waxay casarkii kugu aragtay cishihii kugu caydaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Soomalidu waa indho ku garaadle.

Soor quudheed lama cuno xoolo quudheedse waa la qaataa.

Soori waa in xil lagaga tago iyo in xarrago lagaga tago.

## Xarafka ‘sh’.

Shan shidda ma macaysaa.

Shiikh markiis yimaado, shariifku, shubaakaduu ka baxaa.

Shimbir duul duul badani af libaax bay gashaa.

Shimbirba shinbirkiisuu la duulaa.

Shinbiri laba geed ma wada gurato.

Shimbiri maalibay dab qaaday buulkeedii baanay ku gubtay.

Shir looma wada uunsiyo.

Shir naagood oo shan dhaafay waa shar.

Shisheeye sheela duxa ma leh.

Shubaali waa biyo la bax.

Shan nin oo shidho qayb leh, hal shanshaa ka baxda, shan ninnaan shidho qayb lahayna, shan shanshaa ka baxda.

## Xarafka ‘Dh’.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Dhabada yari dhabada wayn bay kugu ridaa.

Dhac dushii laguma wada hadlo.

Dhadhan shaa waalan dhergaana ka sii daran.

Dhagar qabe dhulkaa u dhaq-dhaqaaqa.

Dhagax meel dhow buu ku dhacaa, hadalna meel dheer.

Dhagax tuujin iyo taabasho waa isugu mid.

Dhalaan qayladu waa qaboonada.

Dhaliili dhaban bay ku taal.

Dhalinyaro dhubuq dhubuq hore dhabana hays danbay leedahay.

Dhallaan dhargay fartaa loo lulaa (way iska qoslayaan).

Dhallaan qayladii waa qaboonada.

Dhar kaa dheer dhaxan kaama reebo.

Dhariga kuleelka waxaa ka keena Dabka.

Dhaxal gorayo dhabad baa leh.

Dhaxal goroyo dhebed baa iska leh.

Dhedo roob noqon weydey.

Dheere iyo gabane un baa jiree, Dhuubane majiro.

Dheerow ii gaabow yaa jaree, dhuubow ma jaro.

Dheg haddii la jaro daloolkaa hara.

Dheg wax xun maqlaysaa wax wacan ma weriso.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Dhegta hadii la gooyo daloolkaa hadha.

Dheriga karkaa maxaa ka keenay, kuleyl weeye.

Dhib lagula qabo dhib ma eh.

Dhicisku inta mindida loo soo siduu bakhtiyaa.

Dhidar xabaalo qod bartay qudhin buu uga dhacaa.

Dhiig islaan ma qarsoomo.

Dhiil maran iyo dhiil buuxa la iskuma dhufto (Wax aan isu qalmi la isma dhaafsado).

Dhoofaa kaa dhimay! (bal tan ka warran, ma run baa?).

Dhool bari ka soo kacaa dhaan loo nageeyaa.

Dhubuq-dhubuq hore dhabanahays dambey leedahay.

Dhur waa la tegis bartay ka ridistu waa ku ceeb.

Dhurwaa dhoomo laguma rarto.

Dhurwaabaa lagu yidhi fool xumidaa, markaasuu yidhi walaalkay weerana ma aragteen.

Dhuumasho dhabarka muuqato dhuumasho ma aha.

## Xarafka 'C'.

Caana daatay dabadood la qabay.

Caano baqay haddaad aragto, waa bi'iso naaggood.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Caano Jiilaal canba canbid.

Caano yar iyo ciidan yarba marka la waayo ayaa la tebaa.

Caasigaada iridkaaga ma mooga, baarri dadow dad kuuma noqdo.

Cadaabi cadaab bay ka subxaanay sataa.

Cabaad badan waa rag ceebtii.

Cadawgaa looma taahee, tun ku adkay.

Cadho walaal waa la bariyaa (waa loo dulqaataa walaalkaa).

Cadku ceeji, xil iyo geeriba kuu dil.

Calaf waa intii calool gashaa.

Calafkaa, nin ku rabaa baa haya.

Caleen qudhac calool geel ma buuxiso.

Caleen qudhac calool geel waxba kama tarto.

Cali noolba wax sii.

Calool adayg waa illaahay wehelkii.

Calool dheregtay caqli ma leh.

Calool rag waa webi xagaa.

Canaan ka yaab ceesaan ma doojo(waa lagu canaanan dantaada looma seego).

Canaan ka yaab reer ma doojo.

Canbe laf baa ku jirta.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Canjeero sida ay u kala korreysaa Loo kala qaadaa.

Canjeero siday u kala koreysaa loo cunaa.

Caqli gaal iyo indho quraanjo lama arko.

Caqli: Dugaag sankuu ka galay; Xoolo, sankuu ka galay; Rag, xabadkuu ka galay; Naago, indhuu ka gala.

Car faruurow foori gaalee?.

Carab iyo ilkaa cid isugu dhaw iyana weeys qaniinaan.

Carab iyo labadiisa daan baa isugu dhaw iyana way is qaniinaan.

Carab lo’ aad caws looma tilmaamo.

Caro walaal waa la bariiyaa (subax baa lala sugaa).

Carraabo, fadhaa quusiyey.

Carrab dalab leh waa la gartaa, uur dadbanse lama garto.

Carruurey cayntaa ba´day.

Carruur kor cabsado ayee leedahaye, kal cabsado ma leh.

Carruurta mulaca cayaar cayaar bay u dishaa, isagana waa u qur gooyo.

Caruur gaalana ma aha muslinna ma aha ee waa kii lagu daraa.

Caruuri waa ciil laga waynaado.

Caruurnimo waa cudur laga koro.

Casarkii wixii kugu dhacaa cishihii lagugu caayaa.

Ceeb looma dhinto, caro lalama qarxo, cayna looma dhaawacmo.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Ceebtaaday kow ogtahay, kun looma sheego.

Ceel biyo lihi ma foga.

Ceel dad liqa, ul baa lagu dayaa.

Ceesaan ninkii weyddiinteda kugu dhiba kaxaynteedaa lagu dhibaa.

Ceesaantii arigeeda diidda orgi shisheeyaa saarta (fuula, u baxa ama ka qabsada).

Cid wax kusiisa wax badan baad aragtaa, cid kula talisa se wax yar.

Cidlo ciirsi maleh.

Ciirtaa dhamaa, ceebtaada yaqaan.

Ciise socod kuma laabna, abeesona samir kuma laabna.

Cimri gaada oo dheeraadaa geel dhalaya ayuu ku tusaa.

Ciyaar baa dhab u gadoonta.

Ciyi waa ka beryey.

Ciyigii waa ka beryey qofkii cunay baa ka liita.

Ciyowga habeen dhawaaqay wax uu ka cawduu dareemay.

Col hortii baa hub la samaystaa.

Col iyo abaar cagahaagaa lagaga baxaa.

Col iyo nabad mid baa caynka lagu xejiyaa.

Col kaa badan iyo biyo kaa badan waa ku hafiyaan.

Col ku galay cabsi kugu reeb.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Col naago ka kacay iyo cadho nirig ka kacday midna sahal kuma qabooboaan.

Col Ninka soo arkay iyo kan Looga warramay isku si uguma wada Cara-raan.

Colaad iyo nabadi meel ma wada joogaan.

Colaadi gurigaaga way kaa kaxeysaa ku kalana kuma geyso.

Colka wadhaf ma lagu dayey.

Colkaa ma dhamaadee ka kuu xigo ha u danbeeyo.

Cudud caano gaabsheen cagaar ma korsho.

Culimo dad u eki bay kugu dishaa, abeesa na dhul u eki.

Cuntada waxaa loo cunaa inaa ku noolaati, balse uma noolid inaa wax cuntid oo kaliya.

Cuntadaan gacantaada ku jirin iyo afkaagu way kala raagaan.

## Xarafka 'G'.

Gartaada dibadda baa lagu akhristaa.
Gaashaan qaad ma habaabo.
Gabadhaha dheg dameer baa ku darsanta, wiilkana tin wax la'eg.
Gabahii hooyadeed haruuka tuntaa, iyadana hufidiisa way barataa.
Gabar gob ma ahee, aabbeheed baa gob ah.
Gabari waa xoolo guneed.
Gabari waa guur u joog.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Gabari xabaal ku astur ama nin ku astur.
Gabarta dhowrani waa la aroosaa, gunga cusubna waa la degaaa.
Gabooyoow, waxtarkaa waa wadajir, keli kelina lib ma keento.
Gabowgayga iyo gaado baa kulmay.
Gacalkaa gacmo u waa.
Gacan aan dufan laheen wax ma duugto.
Gacan bannaan taal gar-gaar keeda ma dheera.
Gacan gacan bay dhaqdaa, wadajirna wajigay dhaqaan.
Gacan gadaal garab ayay u gashaa.
Gacan gadaal ka baqaysaa geed ma gooyso.
Gacan iyo af la islama waayo.
Gacan jabtay gun ayay dhex taal.
Gacani waa nin lihi u go'do.
Gacani waxay hayso ayay gooysaa.
Gacanqaad aan laguu ogayn iswadh baa la yiraahdaa.
Gacantaadan goysan Karin waa la dhunkadaa.
Gacantaadu hadday solo gasho, Laguma soo dhufto ee waa lagu dhirin dhiriyaa.
Gacantii libaaxa soo qabatay iyadaa furta.
Gacantii qaad-qaad barataa gummudkeedaa dhaq-dhaqaaqa.
Gacmaha waa la dhowraa lugna waa la dhibaa.
Gacmo geel jire gadaal looma mayro.
Gacmo is dhaafaa gacalo ka yimaadaa.
Gacmo iyagaa is xala.
Gadaal ka gaar waa goob dumis.
Gafuur cawo wuxuu gubaa nin kiisa.
Gal dadliq ah ul baa layskaga dayaa.
Gambar salka saar mooyaane seexasho ma leh.
Gar dabadeeda guunuc baan nacay.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Gar daro garab og iyo gaajo guri og midna lagama kaco.
Gar diid waa alla diid.
Gar iyadoo gacan laheyn ayay geed kugu xirtaa.
Gar karkoor waa martaa, nin marsiiyey sa doontaa.
Gar nin sheegay ma laddiyin.
Gar waa loo wada islaam.
Garaad guri gooni uma aha.
Garab- ku guur Geel-la'aan baa leh.
Garawsiinyo waa sad waayeel.
Garba gar baa la tusaa.
Gardarro garab og iyo gaajo guri og midna lagama kaco.
Gari allay taqaan.
Gari laba nin kama wada qosliso.
Garow iidaankii waa gaajo.
Garow iidaankii waa gaajo.
Gartaada inta aadan geedka tagin baa la naqsadaa.
Geed dheer geed gaaban ayaa lagu koraa.
Geed joog gartii wuu yaqaan.
Geed kaa dheer kuma dhaxan tiro.
Geed lagu dhacay gacmo lalama tiiksado.
Geed sal beelay dushuu ka bololaa.
Geed waa madal, inta joogtaana waa markhaati.
Geed walba dhacaankiisa ayuu dhalaa.
Geed walba in gubtaa hoos taal.
Geed waliba mirihiisuu dhalaa.
Geed waliba waa xaftiisa.
Geedka weyn gudin yar baa gooysaa.
Geed kaad gaarto miro ka gooso.
Geedkaad qoyaankiisa la yaabto intii hal bislaysaa ku jirta.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Geedkii fudayd lagu koraa fudeyd baa looga soo degtaa.
Geedkii labaatan jir lagu waabo lixdan jir baa lagu harsadaa.
Geedyahow, haddaan xabag kaa helinna kaa goostay, haddii kalene kuma ceebeeyo.
Geel aan gaawo loo hayn lama godlo.
Geel aan qowsaar lahayn iyo aria an qowdiido lahayn midna ma dhaqmo.
Geel ba'ow , yaa ku leh.
Geel carruuri qaadday ma foga.
Geel cisii daaqay iyo gob nugul waa laga waaq durraan taa.
Geel dhallaan qaadday ma dheera.
Geel diday dooh-dooh loogama haro.
Geel duq baa loo tumaa.
Geel duqdiisu dur durisay aarankiisana maxaad moodday.
Geel fudeydna kuma rimo, fudeydna kuma dhalo.
Geel geel waydaartay geeda la'aan dheh.
Geel jeeni kama go'o.
Geel jire dhawaan ddiidey dheeraan ka daba roor.
Geel jire geeddi kama naxo.
Geel jire geela waa wada jiraa, waana kala jiraa.
Geel jire guri ma leh.
GEEL Laba jir soo wada mar.
Geel lama hor gooyo ee waa la gaar gooyaa.
Geel lun laguma riixo.
Geel maalin buu ceel joogaa.
Geel nabar aanu ogeyn buu ka gaggabaa.
Geel nin aan lahayn geeridii war ma leh.
Geel qaylo xun lama dhicin karo.
Geel shafkuu ku hurdaa, Ragna wax-shinsi.
Geel waa "dooh" farsana waa "deeg", wiilna waa "daa".

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Geel waa xawr, fardo waa xawli, riyo waa xoox, rag waa xaajo, Naagna waa xishood.
Geel wada sibir godan.
Geel wuu is geedo baraaa.
Geel wuxuu is geedo baraa.
Geela habeenba inta uu soo hoyataa ayuu deeqaa.
Geela xerradiisa waa nabad.
Geel-doono geeso dhiig leh bay dhashaa.
Geelna waa geel wixii gooyaan waa geel.
Gees Lo'aad kuleylkaa lagu gooyaa.
God aakhiro gadoon ma leh.
God walalle ha qodin, hadii aad qodina ha dheereyn ku dhici doontidaa ma ogidee.

## Xarafka 'Q'.

Qaadis iyo jiidis waa isla guryo geyn.

Qalbigu laba ruux ma wada qaado.

Qawl nin wayn ka dhacay waa qolof geed ka dhacday.

Qaybshe qad ama qaaday.

Qof aan waxa jooga garan waxa soo socdana ma garto.

Qof caashaq hayo wax ka calaacal badan malaha.

Qof nool oo ku hortaagan lagama quusto.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Qof walba qumanihiisaa qoorta ugu jira.

Qof waliba intuu cunuu ciidamiyaa.

Qof waliba wuxuu dhigtuu dheeftaa.

Qofkii aragiisu ku deeqaa oontiisuna ku deeqdaa.

Qoryo adistooda isku duwis baa horreysa.

Qosol badani qoonsimaad noqoy.

Qosol hiil leh.

Qosol qoonsimaad noqay.

Qufac iyo uur midna ma qarsoomo.

Qunyar socde qodaxi ma mudo.

Quruxi waa ishaada, qiimana waa ayaankaaga.

Quud aan jirin qoryo u guro.

## Xarafka 'K'.

Ka daroo dibi dhal.

Ka door ka dar bay dhashaa.

Ka fiirsasho waa dhar-baaxo ka hor.

Kaa hadal badane kaa adag.

Kaadi badane waa loo gogol badiyaa.

Kaadi ul dheer baa layskaga duwaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Kaadsade ma kufo.

Kaaf iyo kala dheeri, kaan u dhigtayba ma ah.

Kab fallaareed Ninba meel iska tus, arrinina Nin bam eel iska tus.

Kab iyo xaarkeeda waa la isla xooraa.

Kab xume ma hadhee kablaawaa hadha.

Kabatole kaba la'aan buu socdaa.

Kabbo geel kabtin bay ku waddaa.

Kabbo uur ku madal leh.

Kadabkaa waa wixii karreysahaaga dhaafa.

Kaftan geeljirre dhab buu tagaa.

Kaftan waayeel waa kow iyo labo.

Kaftan yaqqaan ma halmaaamo.

Kal gacaylka aad dalkaaga u haysaa waa iimaanka ka bar.

Kal gaceyl waa indho la yahay.

Kala go' iyo kala lulasho, kala lulashaa la qaatay.

Kala war la' Nin dhergan iyo nin baahan .

Kalluun asigaa la isku jillaabaa.

Kalluun mar baa la gowracaa.

Kama-dare "dagaal" dheh.

Kan ku dagayo kaama dheera.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Karis-xun iyaduna wax ku la’.

Karti laawe deg deg buu door bidaa.

Kas Dumar oo kadalloob rag kaaga dambeeyey kaad ku ogeyd ma ah.

Kas waayeel kabbo isma dheera.

Keligii cune keligii buu dhintaa.

Keligii cunne keligaa cel-celi.

Khaa’in afkuu kuugu dhun kado ayuu kuugu qanii-naa.

Khawuuro iyo nin kii loo wado lama kala qariyo.

Khayr ha falin, shar kuuma timaadee.

Kibir hoos buu kaa saaraa, meelse kuma geeyo.

Kibirka waa lagu kufaa, waana lagu kala jabaa.

Kii aabbe iyo hooyo soo barbarian habeenka iyo maalin kaa bar-baarin.

Kiwaawe beereey, ninba kolkiisa waaye.

Kobtaada iyo tolkaada dhexdaa looga jiraa.

Kobtarraa godka qodda, dawacaddana libta leh.

Kol uun baa wax kaa muuqadaan oo dibin daabyadii aad wadday lagugu gartaa.

Kolba carradii la joogo camalkeedda ayaa la yeeshaa.

Kolba sida loo jabaa loo dhutiyaa.

Kolka la qaadayba shalmaddii raacday.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Kor dad kabbo isma dheera.

Kor waayeel waa wada indho ama waa wada caqli.

Kud ka guur qanjo u guur.

Kudkude nin kii alla kuu jabsho cun.

Kududsani keyd ma dhasho.

Kula-jire kaa jirre iska jir.

Kun iyo koow keebaa waalan.

Kun qofba ma barido.

Kun saaxiib waaa yar tahay, hal cadow waa baddan yahay.

Kuu-sheekeeye kaa-sheekeeye lallama sheekeesto.

## Xarafka 'L'.

La hel, la hel la waa baa xigta.

La jiifiyaana Bannaan la Joojiyaana Bannaan.

La tuuraa la tuugaa.

Laabi laba u la'

Laabta low ma aha hadba la laallaabi karo.

Laabtana way quurtaa, farahana way dhiibaan.

Laafiyo aadan u dhalan lix saamood ma dhaafto.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Laako sagaaro raq mooyee ruux isma taraan.

Laanta toosi intay curdun tahay.

Lab ka kacay, lugase, kuma joogo.

Lab meel dhacday lama loodiyo.

Laba aan warramin ma wallaaloowdo.

Laba af oo isku eg baa run iyo been kala sheega.

Laba afar jir ah hadba kii habrtiisa la jirtaa adag.

Laba bidde beerkeey iska og yihiin.

Laba biyoo kulul isma qaboojiyaan.

Laba bukta ma is beeniyaan.

Laba caanadoon isma waayaan.

Laba caaqil waa heshiiyaan, laba caaqna waa heshiiyaan, caaq iyo caaqil na ma heshiiyaan.

Laba ceebood taada la jirtaa.

Laba darran mid dooro.

Laba deeq ku heshiin wayday dood kuma heshiiso.

Laba dhaxal ku dirreysa dhalasho ma fiirshaan.

Laba garood oo iska feer dhalata waa la arkaaa, laba bilood oo iska feer dhalatase lama arag.

Laba jir ayaa laba jir kaa seexidda.

Laba kala bariday kala war la'.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Laba nin oo debed seexday, midba gees baad debad ah.

Laba oodafo iskama abaal waydo.

Laba qaaddo af mar ma wada qaado.

Laba qaawani isma qaaddo.

Laba sagaaro didmo mooyee, ee ciidan iskuma taraaan.

Laba saxaax wadaagtay saaxiib ma noqdaan.

Laba talaabo dhaxdood bey talo ka dhalataa.

Laba tallaabo dhexdood baa talo ka dhalataaa.

Laba walba is saaray, laba tagoog isma saarin.

Laba xabxab ah oo gacani hal mar ma wada qaadi karto.

Labaatan jir intuu geed ka booduu talo ka boodaa.

Labada haragga ku diriraya hooyadood waa sida gacantaas.

Labada isla garataa guurku u hagaagaa.

Labadii mar is aragtaa mar labadana way is aragtaa.

Labadii sir u heshiisaa saaq bay u collowdaa.

Labadii si xun u sooreysataa si xun ayay u dhintaan.

Labeenu subug ma ah, labaclabacna hadal ma aha.

Labeeshe ninna ma aha, naagna ma aha.

Labo ceeriin ku qaybsatay biseyl iskuma cawrido.

Labo coloow day caano isma siiyaan.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Labo lugood lagama dhutiyo.

Labo miro gurataa ma heshiiyaan.

Labo talaabo dhaxdooda bay talo ka dhalataa.

Labo xaajo waa is xayeesiisaa.

Lacag wax kasta way gooysaa, hase ahaatee aabbe iyo hooyo dib uma soo celiso.

Lacagna lacag bay dhashaa , injirna qandhicil bay dhashaa.

Laf jabtay sideedii ma noqoto.

Laf dhuux leh iyo labo dhagax la isla waa.

Laf iyo miro Nimaan ilko lahayn baa ilaah u deeqaa.

Laf kaa weyni wee ku jebisaa.

Lafba lafta xigtaa lagu kabaaa.

Lafo maroodi iyagaa la isku jabshaa.

Laga barayba oo lagaa badi.

Laga bartaa laga badiyaa.

Lagu xantaa , Lagu xasuustaa baa ka horeesa.

Lallamma dego nin xeerada kugu yareeyay, martidana kugu xila.

Lallabo waa digniin.

Lama arag lamana maqal waa geel laba laako dhalay.

Lama daardaarto libaax meel ku jiifo.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Lama huraan waa ceel wiyeer.

Lama huraan waa cows jiilaal.

Lama hurraan waa cowska jiilaal.

Lama moodayse ma naqaano.

Lama noqdo biddihii haruurka shiiday oo halkii ugu dambeeye ka tagay.

Lax dhukani col iyo abaarba moog.

Lax gowracan maqaaar-siib kuma xanuunsato.

Lax iyo laxaw meel islama galaan.

Lax walba shillalkay is dhigtaa lagu qalaa.

Lax waliba leggeeday xaadhataa.

Laxiba Nay sheeday wadataa.

La-yeel ma hilmaamo, laakiin yeele wuu hilmaamaa.

Layli biyaha kashiisa ku jiruu ka didaa.

Layligu biyo uurkiisa ku jira ayuu ka didaa.

Laylihu biyaha uurkiisa ku jira ayuu ka buubaa.

La iskama dabo tagee waa la iska feer tagaa.

Leg dheelallaabo laguma cuno.

Lexejeclo laba nin kama qosliso.

Libaax aan dhiig dhadhamin ma ciyo habeen.

Libaax duqoobay daanyeer ayaa ku ciyaara.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Libaax laba raqood lagama wada kiciyo.

Libaax nin aan aqoon baa lax ka rita.

Libaax nin ganay iyo nin galladay kala fog.

Libaax wadar geed lagama kiciyo.

Libin rag kaaga dambeeyey libin ma aha.

Lidaayo is mood moodaysa Laabtay isku haysaa.

Liibaani waa galabsi.

Liibaanteeda aduunyada nina laasan maaayo.

Lilaahi iyo laqdabo meel islama galaan.

Lillaahi laguma lumo.

Lixdan jir haddii la legdo waa isaga iyo taaggii, haddii la khiyaameeyo waa isaga iyo ishii.

Lo'du sac bay siddaa.

Lo'intay cidlo ku geyso ayay kugu ciddaa.

Lo'iyo dumarba diiftay isku eryadaaan.

Lo'iyo naag nin kooday yaqaanaan.

Lo'jire ushii saciisa ma disho.

Lo'leey waa isku taamo, haddii aanay dan kale geynin.

Lo'ul ma aroorisee oon baa aroorsha.

Lo'yahay , nin aan ku soo fulinaynin yuu ku aroorin.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Lo’yahay Nin aan kuu soo fulineynin yuu kuu aroorin.

Loge looba joogee.

Loo soo hoobte waa jiin webi.

Ludda jecli, lafta jecli.

Lugna baqa ugu joog, lugna dagaal.

Luqun dheeraatay madax ma dhaafto.

Luugtii jeeni dhaaftaa way jabtaa.

Luun lixo aragtay lixdaad ma weydo.

Luuq luuq maroow laasim laamiga buu yimaadaa.

## Xarafka ‘M’.

Magac maskiin Lagama aha, maal na mowlaa hayo.

Marti iyo meed waa la maquunshaa.

Meel hoo u baahan hadal waxba kama taro.

Miskiin baa miska la fuulo leh.

Miskiin xanaaqay madaxaa daala.

Mukulaal minin keedA joogto miciyo Libaax bey Ley dahay.

## Xarafka ‘N’.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Naag ama u samir ama ka samir.

Naag intee Geed buuxiso Guri ma buuxiso .

Naag karis xun Nin keeda kaal ku leh.

Naag kas hala haato , karinta hala haato.

Naag la furay fadhi uma yaal, ninkii furane falkii ale ku celiye.

Naag nin ka ween baa dhaqa.

Naago nin ay yaqaanaan nin ma moodaan.

Nimaad dhashay kuma dhalin.

Nin aa talin jirin haduu taliyo, nin aa tagi jirin baa taga.

Nin aad taqaan yaa tahay lama yiraahdo.

Nin aadan saacad ku baran, sanad kuma baratid.

Nin aan dhulmarin dhaayo ma leh.

Nin aan kuu furaynnin yuu kuu rarin.

Nin aan maahmaahin cod kar maaha.

Nin aan qooq dilin maroodi ma dilo.

Nin aan wax garad ahayn haanta gadaankeedaa wax loo saaraa nin wax garad ahna daaqsin geel.

Nin aadan maalin ku baranin sanad kuma baratid.

Nin abaal gala wax badan baa la arkaa, nin guda se wax yar baa la arkaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Nin aduunyo joogoow maxaa arakti kuuu laaban.

Nin ani yidhi dad iska saar.(sooc).

Nin buka boqol u tali.

Nin caadadii ka maydh iyo dundumo ciid ka maydh labadaba waa lagu daalaa.

Nin casarkii isa sheegay, cishihii ceebi ma qabato.

Nin daad qaaday xunbo cuskey.

Nin dameero dabadood ka degay meel uga tooban buu waayey.

Nin dameero rartaa dad la toy ma aha.

Nin dhalasho huwan dhar uma baahna.

Nin dhintay kabihiisaa dhaama.

Nin durbaan tumay ilaaq dalbay.

Nin durbaan tuntay ilaaq dalbay.

Nin duulay dantii kaa og.

Nin faash wataa xaabo ma waayo.

Nin fadhiya, looma saro joogsado.

Nin faruurani ma fooriyo.

Nin habaarani ma harsado.

Nin hadduu isu kaa waalo waa la isla waalaa.

Nin hurdaa la kiciyaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Nin ilko waa wayn haduu dhintna inuu qoslaayaa la moodaa.

Nin Illaahay ka dambeeya kabtii ma yeela.

Nin intuu ul ka boodo ayuu eray ka boodaa.

Nin is faanshay waa ri is nuugtay.

Nin iyo naag is qaba colna ma aha nabadna ma aha.

Nin iyo qabkiis.

Nin jiifa lama legdo.

Nin kaa wayna waxba looma sheego.nin dheerna waxba looma tilmaamo.

Nin kaligii tashaday waa nin orgi rartay.

Nin keligii garramay, iyo nin dhul gannay midna ma gefo.

Nin kii ka daraa ka ree buu is dhahaaa.

Nin ku arkaaya looma saro kaco.

Nin ku necebi xantaa og, nin ku jeclina xogtaa og.

Nin kula yaal baa tabtaada yaqaan.

Nin kuu digay kuma dilin.

Nin la dhacay ama caytan ama habaartan.

Nin la sugayoow adna yaad sugi.

Nin lagu seexdaw ha seexan.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Nin maalin ma gaartid, nina sanad ma gaadhid, nina weligaaba ma gaadhid. nin maalin ma gaadhid oo waa ninka kaa faraska dheereeya, nin sanad ma gaadhid oo waa ninka xoolihiisu sanadkaa meel caws badan daaqiyey, nin weligaa ma gaadhid oo waa ninka kaa gabadha/naagta wanaagsan.

Nin magaalo ka dudaw siigo yare

Nin mar waashay waalida loogama sheekeeyo.

Nin meeli u cadahay meeli ka madaw.

Nin nin kaaa xigo iyo hawl nin kaa xigo midna laguma deg dego.

Nin ood sida iyo nin adhi la joogaa arin ma kala laastaan.

Nin ooman biyaha hoo baa deeqa.

Nin qoyani, biyo iskama dhowro.

Nin qurux badan naagtaada uga yaab nin fool xuna naftaada uga yaab.

Nin rag ah haduu ku fo mar uun buu kacaa.

Nin rag ah looma duur xulo.

Nin reer ugu wayn iyo naag naag ka umulisay midna siday wax u arkaan uma sheegaan.

Nin siktay ma nabad gelin.

Nin soo fadhiiso laga waayo soo seexaa laga helaa.

Nin soori kaa qaaday waa nin seefi kaa qaaday.

Nin tuur lihi sida uu u seexdo isagaa kaa yaqaan.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Nin waalan tolkii baa u miyir qaba.

Nin walba intay taagtii tahay baa qoraxdu ugu taktaa.

Nin walba meeshii buktaa belbesha.

Nin waliba waxa uu yahay ayuu ku moodaa.

Nin war kuu keenay war kaa qaad.

Nin wax dhaqay dhurwaana wax u dhaq.

Nin wax yaqaan daaqsin geel baa wax loo mariyaa, nin aan wax aqoonna qaanso qurqurkeed.

Nin wayn tag lama yidhaahdee wuxuu ku tagaa la tusaa.

Nin wayni waa qorax casar joogta.

Nin wayni wadkiisa waa yaqaan.

Nin xil qaaday eed qaad.

Nin xoola ku siiya in badan baad aragtaa ninse talo ku siiya wax yar baad aragtaa.

Nin yari waa nin ban soo ordaya.

Nina dabeecadiisa lama doorin karo.

Ninaan hadlin, hooyadiis qadisay.

Ninba curadkiisa ceel gee.

Ninba gurigii gaado ku leh

Ninba kaskiisuu kor tagaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Nin gu’ kaa wayn garaad kaa wayn.

Ninka aan hadalka sugin warrankana ma sugo.

Ninka aragiisu ku deeqo ayaa oontiisuna ku deeqdaa.

Ninkaad adhi weydiisanayso, geel weydii.

Ninkii belaayadaada raba, bawdkaagu qori ka jabsadaa.

Ninkii dhagar qaba dhulkaa u dhaqdhaqaaqa.

Ninkii dhimanayaa dheg baa dheer.

Ninkii geed fuulay asiga lee kasoo degi.

Ninkii sabraa sed leh.

Ninkii seexdaa sixii dibi dhalay.

Ninkii talin jiray hadduu tago, midaan talin jirin baa yimaada.

Ninkii tiisa daryeelaa tu kale ku dara.

Ninkii uurka dabana Illaah baa arka, ninkii isha dabana Aadmibaa arka.

Ninna caadidii ma daayo, bahalna ceedhin ma daayo.

## Xarafka ‘W’.

Waa baahan tahay bakhtiga looma cuno.

Waa lagu shareeraa waxay sheegtaba ha waydee.

waalida ninkii soo maraa laga waraystaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

waan xoolo yarahay deeq lagagama hadho waan dad yarahayna dagaal lagagama hadho.

waano dhalan baa ka adag.(ka roon).

Waari maysidee war hakaa hadho.

Waayeel ha soocine, wax aqoonta sooca.

waayeel hadalkiisa kaftan buu ku dhamaystaa.

waayeel hortiisaa caano loogu badhxaa.

Wadaad waa nin.

Wadaanta isha ka xumaataa, faylkay la tagtaa.

Wadaantii geeleeda kaafida, baa mid kalena kaalmeysa.

Wadar iyo waaxid yaa waalan.

wadiiqada yari wadada wayn bay kugu ridaa.

wakhti kaa lumay muruguu reebaa.

wakhti kaa tegay tiigsimaad maleh.

Walaalkaa dhuux tagoogaa loogu soo subkadaa (dhaashadaa).

walaalkaa markhaatiga ku fur magtana la bixi.

walaalo is necebi way xoola yareeyaan wayna xabaalo badiyaan.

walaashaa iskuma hubtid seedigaa ha isi seegina.

wan wayn jeeroo la gawraco indhihiisu cirka ma arkaan.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

war jiraaba cakaaruu iman.

war la’aani waa dhego laaan.

war xumi dugsi ma fadhiisto.

Waraabe daalay, dirirtiisaa loo tagaa.

Waraabe ulla lala gaadhi waa, orodna wax lagaga dhibi waa.

Waraabe dhankii loo eryaaba wa u toos.

waranka ninka kugu dhufta iyo ninka kugu dhaqdhaqaajiya, ninka kugu dhaq-dhaqaajiya ayaa xun.

Wax aad baratay waa baaskaada.

Wax aqoon wax looma sheego.

Wax is waydiintu ma xuma ee wax is waydaarsigaa xun.

Wax la dhalay iyo dhul baa loo marti yahay.

Wax la qarashaa ama qudhme ama qubte.

Wax la waayo looma waasho.

wax raagaa rag kuma sama.

Wax rag kaa galay rako kaa gale.

wax walaal loo diiday wad baa leh.

wax walba run moodaa rag ugu liita.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

waxa jira sadex abaar, abaar geel ,abaar dumar iyo abaar rag. Abaar geel waa ilko laaan, abaar dumar waa ubad laaan, abaar ragna waa arin laaan.

Waxaa ku cunin ba waa la cunaa.

Waxaad qarsataa waaku qarsadaan.

Waxaan calaf ahay lama cuno, waxaan hed ahayna looma dhinto.

Waxaan kashaada gelin, korkaaga yay dhaamin.

Waxaan Nabad iyo Caano ahayn ba waa la kala qaadaa.

Waxaanad filanany iyo fallaari waa kaa fajiciyaan.

waxaanad heli karayn waxaanad u baahnayn baa laga dhigaa.

waxay iL aragto ayaa ilko gooyaan.

weel waliba wixii ku jiruu dhididaa.

weylasha biree dibigu ha ku quustee

Wiil intuu ood ka booduu talo ka boodaa.

Wiilkii is waalaba wiil waabiyaa hela.

wixii ay idho arkaan ayey ilko gooyaan.

wixii faq lagu sheego fagaaray tagaan.

Wixii la arki jiray wixiisii baa lagu akhriyaa, waxaa la arki jirina subxaana laah baa lagu akhriyaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

## Xarafka ‘H’.

Habar fadhiso lagdin la fududaa.

Hadal badan haan ma buuxsho.

Hadal inta uu uurka ku jiro, ayuu amaantaada yahay.

Hadal nin si u yiri nina si u qaaday.

Hadal nin yareeye kama wada tagin, nin badiyene ma wada oran.

Hadal run baa lagu cadeeyaa, ilkana run baa lagu cadeeyaa.

Hilib sooryo ma ahan.

## Xarafka ‘Y’.

Yaad awrkeeda ayaa ka ilmo dhala.

Yaan bilcan lagu dhihin intii soor abaareed ka wadaajiso oo sariigtaada iyo sabarkaaga loo arko.

Yaan lagaa badin.

Yar-yaraysatee wiilkiisa ayaa la tuugaa.

Yax lahaydaa.

## Xarafka ‘A’.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.

# MURTI KAAB

Aadmi la aragyaaba, dhib la arag.

Aan wada hadalno waa aan wada heshiino.

Aar qoyey dacawo la mood.

Abaal dad galaa badan, dad gudaase yar.

Abaal Nin gala waa la arkay, Nin gudase yar.

Abaal raaga rag baa leh, mid baaqdana haween baa leh, mid soo dhakhsadana xoolaa leh.

Abeesada taan sanqarta iyo tan aammusan, tan aamusan baa la qaatay.

Abeesana dhul u eki bay wax ku dishaa, waadaadna dad u eki.

Abeeso yar-yar ma gasho.

Abkeey dooli diloow, dad nool maas u dahaa.

Aboorku inta aanu kugu tufin ayaa lagu tufa

Abtigaa waa kuu ooyaa ee kuuma aargudo.

Abtigaa waa la hidde raacaa.

Abtirsi waxaa dhaama Ragannimadaada In aad la timaaddo.

Abuul sisin In uu joogo iyo in uu jiifo maxaa ka dhaxeeya.

Abuur iyo waano ,abuur baa horreysey.

Adduun Hawli kama dhammaato.

Adduun i khatal.

Adduun waa harka labadiisa galin.

Adduunyadu waa laba maalin: Maalin adaa leh, maalinna waa lagaa lee yahay.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Adduunyadu waxaa laga wareestaa Nin kii kaa weyn, Aakhirana Nin kii kaa cilmi badan baa laga wareestaa.

Adduunyadu waxaa ugu daran Nimaad soortay oo aan kaa sii socon , iyo Nimaad Sugeyso oo aan kuu soo socon.

Adduunyo ka kabo li'id, aakhirana u salaad li'id.

Adeekaa dhib la'aan ayuu ku dhalay.

Adhi been wuu didaa beense ma dhutiyo.

Adhi jiri ma kala abaal waydo.

Adhi jiri xil bay wadaagtaa.

Adhi magantii ma barriiyo.

Adhi shidho laga daayo.

Adiga oo ilaaheey Aaminsan , haddana Arigaaga oodo.

Adigoo harsan waaye malaguu soo hargalay.

Adin waa la dhibaa, ilna waa la dhawraa.

Adoo Nabad isaga fadhiya belooy kaalay lama yiraahdo.

Adoo nabad u balawaara, beloy kaalay lama yari.

Adoo nabad u balowaa , beloy kalel looma yeerto.

Aduun wey kii amoodeey ogaaw.

Af aamusan Lama xujeeyo.

Af aamusani marti ma sedo.

Af aanad aqooni aabahaa wasna waa kaa yeedhsiiyaa.

Af aanad lahayn ileen aamus lama dhaho.

Af aanad lahayn lama qabto.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Af ama reer aw mahdi ha ku hadlo ama lo’ ha kuu daaqdo.

Af caaytamay Nin kiisuu ku yaalaa.

Af daboolan Duqsi ma galo.

Af Daboolan, Dahab waaye.

Af hadlaaba aamus.

Af jabtay sideedii ma noqoto.

AF jooga looma adeego.

Af kaaga Kun ayuu kaa celiyaaa, Addinkaagana hal buu kaa celshaa.

Af macaan gacan macaan baa dhaanta.

Af nooli waa hadlaa Eyna waa ciyaa.

Af noolina waa hadlaa eyna waa ciyaa.

Af qoyan war ma daaayo.

Af waa kane, maxaa lagu aamaa.

Af wax cunay xishoo.

Afar gacmood abaar ka daran (Hunguri weyni waa cudur).

Afar layskuma daro: Waan guuri; Waan guursan; Geel baan qaadi; Geenyaan gadan.

Afar waa afar: Noloshu waa Niyad; Naftu waa qaali; Nacaybku waa olol; Nabsigu waa qaraar.

Afar-addinle waxaa ka halis baddan Laba-addinle.

Af-ka nool abooto mudac.

Afkaad goojaamo kaga keentay kula hadal.

Afkaagoo ku xidha oon ku furin alle goo baa la yidhaahdaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Afkii dab yiri ma guban.

Afxumo nabad way kaa kaxaysaa colaadna waxba kaagama tarto.

Ag-joog, Ninkii xilo doonayowna Xamaro agjoog.

Alif kaa xumaaday Albaqra kaama haro.

Alif kuu Hagaagaa al-baqruu ku gaarsiiyaa.

Alla aamin ma iisho.

Allahayoow Aqoon darro Hanagu cadaabin Eexna hanooga Tagin.

Alle watow wehel uma baahna.

Allow aqoon xumo hannagu caabin eexona hannooga tegin.

Allow nin aan wax ogeyn ha cadaabin.

Ama afeef hore lahow, ama adkeysi dambe lahow.

Ama buur ahaw, ama buur ku tiirsanow.

Ama faro dufan leh ku qaad ama faro dac leh.

Ama waa la muuqdaa ama waa la maqanyahay.

Ammaan lama dhu-dhumiyo.

Ammaano cirkaa diiday, oo dhulkaa diiday, oo Aadmi baa qaatay.

Ammaano kugu raagtey inaad leedahay baad mooddaa.

Amxaar la arag yaaba ferenji xaaji.

Amxaaro madax gumac galay leedahaye madax hadal galo ma laha.

Aqal libaax lafo lagama waayo.

Aqoon la’aan waa iftiin la’aan.

Aqoon xumo abaar ka daran(qorsho xumo abaar ka daran).

Arin nin la toosan ayaa nin kale tuur la leh.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Aroos lagama raago, lagumana raago.

Arrad waa dan uskagse waa doqonniino.

Arrimo rag waa mudacyo afkood.

Arrin aan sidii futo riyaad la feydin, ma fayoobaato.

Arrin kaa tagtat Ahaa sooma celiso.

Arrin waa mid kugu soo booddiyo, mid kugu bariday.

Arrin xumo abaar ka daran.

Atoorku intiisuu guun ku yahay.

Awr awr wado iyo nin naagi waddi midna kaama leexdaan.

Awr kala guurtay uurar kala guurey baa ka xun.

Awrba awrka ka horreeya ayuu horraan-qaadkiisa leeyahay

Awrka danbe awrka hore socodkiisuu leeyahay.

Ayax teg eedna reeb

Ayaydaa taag darran iyadoon tabar lahayn bay dadka isku taagtaagi.

## Xarafka ‘E’.

Erray nimaan dhaafin odday ma dhalin.

Ey is cunaysaa waraabe iskama celiso.

Eydin geel kolba waa ninkii ku danbeeya.

Eygii oo laf diiday ma noola.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

## Xarafka 'I'.

I jiid aan ku jiidee waa gacmo daalis.

Ido indhahooda waa caricad.

Iimaan Allaa uur buuxsha.

Il Ribix Arkayso Rixin ma daydo.

Ilaahay intaan ka bartay waan hoos joogay.

Ilaahay Xeero weyn baa lagu baryaa.

Ilaaheey weel ween baa la hoorsadaa.

Ilaahoow nin aan wax ogey ha caadaabin.

ILaahow Eexna ha noogaga tegin, aqoonla' aanna hanagu cadaabin.

ILaahow seddx adaan kaa magan galay

Ilayn, Naago kula tol ma ah.

Ilbaxnimada dunida aqoon baa u indha ah.

Ilko abeeso hoos bay ka xidhiidhaan.

Ilko caanood cunto lahuma calashado.

Ilko wada jir beey wax ku gooyaan.

ILLaaheey Eray Gef ah waa kaa yeeriyaa, kuugumase dhaafo.

Illi buuxay aragtaaye barako ma aragto.

Illi subag ma dhuugto.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Illig bolol ah baa af qurmiya.

Illin la aan oogadaa ololi lahayd.

ILLin La qubay Deyn LAguma qaan gudo.

Ilma aabahooda kama run badna.

Ilma adeer isma indho buuxshaan.

Ilmahaagoo kuu ekaadaa oridaada ayaa looga abaal celshaa.

Ilmo abaareed madar Laguma mantaajiyo.

Ilmo dameeraad ishuu ka rar qaataa.

Ilmo ul ku day, am ail.

Ilmuhu habar tooda bay ku ooyaan , Adoogoodna waa ii dayaan.

Imaatin dambe maqnaasho baa dhaanta.

In Rag karo ayaa reer ka dhintaa.

In wax la dhalo waa Gaashaan kii geerida.

Inan iyo Nin kii aabbihii dilay way is moogyihiin.

Inan rag hal uu kugu hadlo iyo hal uu kaa haysto Labadaba Leh.

iNan yahay, anigu ku sheegi maayee shan bilood yay ku sheegin.

Indheer – garad rag waa ku yar yahay, naag na kuma ba jirto.

Indhihii dhiman waayaa geel dhalaayay ku tusaan.

Indho ari waa riyo.

Indho run bee ku ooyaan, ilmahana habartooda bay ku ooyaan.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Indhoole kelli hilib ugu dhan.

Inta buufimo taal biri ma qabowdo.

Inta dhogortaadu dhan tahaa la dhawrsadaa.

Inta gaari la raadinayo ayaa goonbaar wiilkeeda geela dhiciyaa.

Inta jilaal loo adkeysto jir roob looma adkeysto.

Inta La is hayo La isma tabo.

Inta la nool yahay qofba qofka kale u baahan yahay.

Inta magacu' bi'I lahaa maalku ha ba'o.

Inta nabaddu joogtaa ninba labo nin le;eg yahay.

Intaa dhib-qabe hadlin ayaa dheef-qabe hadlaa.

Intaaad qaleysay anna waan qaybinayay.

Intaad xadi lahayd xamaalo.

Intaan riix-qabe hadlin ayaa raaxo-qabe hadlaa.

Intii ari foof jiraa laga fogaadaa.

Intii calooshu bugi laheed cagtu ha bugto.

Intii jar jiray quruuruxxna waa jiray .

Intii la cayriyo been baa u gaabisaa.

Intii nin dhibta wadar ma dhibto.

Irmaan wuxuu cuno ayuu dhiqaa.

Is Xasuustaa is Xabaashaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Isha qorayga mudaya ma argot.

Isha way nasiib baddan tahay, laakiin Nabarka riddi doona ma aragto.

Ishaa macalin ah.

Ishii aragtay burur.

Ishii sariir u muuqataa seexata.

Ishiisa Laga-arkaa u shiisa baa Lagu tumaa.

Isku dayasho dameer baa dhintay.

Isku dey waxay dhaantaa iska dhaaf.

Isku haleen baa dameer maqaayad ku galay.

Isma-huurtooy, hays halleyn.

Is-moog aqalkay asleysaa.

Is-qariye ma qufaco.

Is-xasuustaa is xabaalaa.

Iyamaad doorbidday dhul abaar ah, se se Nabbadi taal, iyo dhul barwaaqo ah, se colaadi taal.

## Xarafka 'O'.

Ood is qabsatay maroodina way qarisaa.

Ood kaa dheeri kuma dhaxan tirto.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 0025261721641.

# MURTI KAAB

Ood qaadis iyo jiidis waa isla guri geyn.

Oodi siday u kala sarreeysaa loo kala guraa.

## Xarafka ‘U’.

Ul jiiftaa ma jabto.

Umili ilawshiinyo dhaw.

Usha intay qoyan tahay ayaa la toosiyaa.

Ushaada nin aad ka qaadi kartaa loo dhiibtaa.

Waxaa qorey. qoraa sare : C/Risaaq cabdi cilmi (maanqaboojiye). 00252617211641.